Quwad Dhaqaaleyn

- Horudhac
- Maxaad sameyn kartaa si ay quwadi kuugu Dhaqaalowdo
- Fikrado aan lacag kuugu kaceyn
- Fikrado lacag yar
- Fikrado kale aad quwada ku dhaqaaleysid
- Waano quwad dhaqaaleyn ah
- waano qadka telefoonka si aad u yareyso quwada
- Sidii aad u heli laheyd lacag kaalmo ah
- Waano Madaxbanaan
- Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno

Horudhac

Quwada inaad yareyso waa kuu wanaagsan tahay,taa micnaheedu wuxuu yahay lacagyar oo aad dhiibto iyo adduunka o aad ka yareyso kuleylka Hawada gala.Buugani wuxuu kuu tifa tirayaa sidii aad lacagta aad bixisid u dhaqaaleyn laheyd haddii aad quwada dhintid,isla markaana gurigaaga aad u kululeyn kartid.Haddii aad la socotid tilmaamaha ugu fudud ee aan ku siineyno.

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay in lagu siiyo lacag kaalmo ah,taasoo kugu caawineysa inaad ku dabooshid gurigaaga meelaha qabowga ka soo gelayo.
Haddii aan nahay EDF energy Arrintan ah sidii aad u yareyn laheyd quwada,si xoog leh ayaan culeyska u saarnaa.Waxaanu rabnaa inaan ku caawino si aad lacagtaada u dhaqaaleyn laheyd,waxaana rajeynayaa in buugani uu ku caawiyo.

Dhaqaaley quwada,dhaqaaley lacagta,caawina sidii lagu badbaadin lahaa aduunka(caalamka)

Maxaad sameynkartaa si aad u dhaqaaleyso quwad?

Dhaqaaleynta quwada

Aad bay u fududahay isticmaalida sidii aad quwad u dhaqaaleyn laheyd,adigoon wax lacag ah aanu kaa baxeyn.Adiga ayaa xukumi kara sidii aad u dhimi laheyd lacagta aad isticmaasho,Ama waxaad dooran kartaa inaad isticmaasho lacag yar si aad u badbaadisid lacag badan.

Waxaad xusuusnaataa haddii aad isticmaasho quwad yar,waxaad waxku soo kordhineysaa sidii loogu noolaan lahaa meel caafimaad leh.

Fikrado aan lacag kaa baxeynin

Fikrado aad taano kuugu kacaynin:

Haddii aad la socotid tilmaamahan fudud waxay kugu caawinayaan sidii aad quwada u dhaqaaleyn laheyd,iyadoon wax lacag ah kaa bixin.

Daahyada:

- Daahyada soo xir (isku soo dhowey) Markey qoraxdu dhaceyso,si kuleylku uusan uga bixin guriga.
- Daahyada haku daboolinka kululeysada ama birta waxkululeysa,taasi waxay keentaa in kuleykii uu ka baxo daaqada.

Kuleylisada

- Kuleylisada ha dhigin daaqadaha hoostooda ama haku daboolin daahyada,taasi waxay qasaarisaa kuleylka waana Qatar.

- Iska ilaali inaad albaab ama daaqad aad furto si aad u qaboojisid qol aad kululaysay, saacada kululeysada inaad hoos u dhigto baa la qaataa.
- Haddii aad hoos u dhigtid saacada kululeysada oo keliya 1ºc waxaa kuu dhaqaaleysmaya 10% lacagta aad bixisid.
- Waxaad dhaqaaleyn kartaa lacag badan haddii aad saacad ka dhinto maalin walba mudada aad guriga kululeynesid.Laakiin aad ha u dhimin kuleylka:Qatar ha gelinin caafimaadka dadka jiran,yaryarka iyo dadka duqeyda ah.

Fikrado aan lacag ku kaceynin

Kululeynta biyaha:

- Xasuusnow ha geynin saacada kuleylisada kor,tan biyaha kuu kululeysa.60ºC/140ºF taasi waa kugu filan tahay.
- Isticmaal tubada lagu qubeysto ee istaaga ah,haddii aad mid haysato waxaa kuu dhaqaaloobaya waqti,lacag iyo biyo.Maskaxdaada geli tubooyinka xooga leh waxay isticmaalaan biyo ka badan tan tubooyinka caadigaah ay isticmaalaan.

Telefisiyoonka iyo Rikoorada:

- Ha uga tegin telefisiyoonka iyo waxyaabaha kale ee korontada isticmaala kumeel gaar ahaan ama kaarikeynta micnola'aanta ah.

Talaajooyinka:
- Barafka ka daadi talaajada marwalba si shaqadeeda kuugu wanaagsanaato.
- Ha gelin raashiinka kulul talaajada,hakaa qaboobo marka hore.
- Haddii ay suurto gal tahay ,talaajada waxaad dhigtaa meel ka fog foornada.
- Marwalba xir talaajada sida ugu dhaqsiyaha badan haddii aad furto.

Nalalka
Dami nalalka haddii aan qolka la isticmaaleyn.

Fikrado aan lacag kuugu kaceynin

Dharka guriga lagu dhaqayo
- Isku day inaad sugtid ilaa dharku uu ka ururo si aad u isticmaashid makiinada dharka.
- Waxaa wanaagsan inaad isticmaasho makiinada nuskeeda ama barnaamijka dhaqaalaha haddii makiinadaadu leedahay.
- Haddii ay suurta gal tahay,dharka ku qalaji xariga dharka lagu qalajiyo.
- Waa inaad qorsheysaa marka aad waxfeereyneyso,si dharka u baahan quwada yar aad u feereysid marka hore.

Fikrado aan lacag kuugu kaceynin.

Kumbyuutarada.
- Sawirada wejiga hore ee kumbuyuutarka waxay keliya oo caawiyaan muraayada kumbuyuutarka.haddii aysan sawirada aad ku badbaadineysid muraayada ay daminaynin muraayada.Marka waxaad xusuusnaataa inaad demisid kumbuyuutarka haddii aadan isticmaaleyn.

Makiinada alaabta lagu dhaqo.

- Isticmaal quwad hoose ama barnaamijka dhaqaalaha haddii aadan haysan alaabo aad u wasaq badan.
- Haddii ay suurtal gal tahay,waxaad sugtaa inta ay alaabo badani ka soo ururaan intaadan isticmaalin makiinadaada.

Jikada(makiinada wax lagu kariyo)

- Waxaad isticmaashaa birta godadka leh ee rootiga lagu kululeeyo intaad isticmaali lahayd makiinada waxlagu kariyo(meesha rootiga)
- Isticmaal surfiyada ku haboon cuntada iyo jikada wax la saaro(birta)
- Daboolka saar surfiyada gaabina dabka.
- Ha isticmaalin biyo badan oo aadan u baahneyn.
- Isticmaal kirliga biyaha lagu kululeeyo hadaad u baahato biyo wax lagu kariyo.

Fikrado ay lacag yari ku kaceyso.

Fikrado ay dhaqaale yari ku baxeyso.
Waxyabahan aan kuu sheegi doono,waxyar oo lacag ah ayaa kaaga baxaya laakiin si wayn ayey kuu caawineysaa si aad u dhaqaaleysid lacagta aad ku bixisid quwada.

Kululeynta:

- Waxaad ku xirtaa warqada almuuniyamka birta waxkululeysa gadaasheeda(dhinaca dhalaala aadi birta wax kululeysa) .Taasi waxay kaa caawisaa in kuleylka uu guriga ka bixin.

Biyo:

- Haddii aad heysatid tubo ay biyo ka da'ayaan,hubso in si degdeg ah loo sameeyo:Hal maalingudaheeda,biyaha dhibcaya waxay qasaariyaan biyo ku filan saxanka lagu qubaysto oo biyo kulul ka buuxaan.

Cubida guriga:

- Ku dabool jaakada kuleylka ilaalisa haantaada biyaha kululeysa,waxaadna dabooshaa tubooyinkaaga biyaha kulul.
- Xusuusnoow inaad soo gadatid jaakada haanta biyaha kulul lagu daboolo mid ingriisku ogol yahay.
- Waxaad ku xirtaa sharootada dabeelaha reeba dariishadaha iyo albaabada gudaha iyo albaabka meesha waraaqaha looga soo ridana waxaad ku dabooshaa birtii lagu daboolayey ee soo laalaaday.

Fikrado kale oo aad ku dhaqaaleyn kartid quwada

Horumar xoogaa lacagi ku kacdo,kuuna dhaqaaleyneysa waxbadan:
Tilmaamahan soo socda waxay kuugu kacayaan xoogaa lacag ah,laakiin waxay kaa caawin doontaa sidii aad lacagbadan u dhaqaaleyn lahayd.
Xataa waxay wax ku dareysaa qiimaha gurigaaga.

Kululeynta:

- Saacada lagu xukumo birta biyaha kululeysa,meesha laga wareejiyo waxaad xukumi kartaa qolwalba heerkulkiisa,taasina waxay si aada u yareysaa lacagta aad ku bixisid quwada(tamarta).si aad ugu ogolaatid si biyuhu u durduraan biraha biyaha kululeeya,waa inaad ku dhaaftaa hal birta biyaha kululeysa ah iney furnaato marwalba.
- **Gurigaaga ma waxaad ku kululeysaa Qoryaha dabka lagu shido ama mida korontada lageliyo ee kuleyka guriga ku firdhisa ama marwaxada waxkulleysa?**

Kuwani aad bay qaali u yihiin,markaad u eegto hababka kale ee waxloo kululeeyo.Haddii ay suurta gal tahay waxaad ku fikirtaa sidii aad ugu badali lahayd kululeynta la keydiyo ama kululeynta guriga dhexdiisa lagu sameyo lehna tubooyinka guriga dhexmara.Tani waxay kuu

soo kordhisaa sidii aad lacagyar ugu isticmaali laheyd,qaas ahaan haddii gurigaaga si fiican loo cubay.

- Haddii haantaada biyaha kululeysaa cimrigeeda ka weynyahay 15 sano,waa inaad bedeshaa kuna bedeshaa mid noocyada cusub ah,quwadana dhaqaaleysa,cabirkeeduna saxan yahay.Haanta wax kululeysa e ka sameysan unugyada ad adag aadbey u dhaqaaleeyaan quwada 90%,taasoo lacag ka jareysa wixii aad bixin jirtay sedex meelood halmeel.

Fikrado kale oo quwada kuu dhaqaaleynaya

Gurigaaga meesha kore ee cubida u baahan.

Ku dabool meesha sare ee guriga 270mm buuran,una eg dhalo dunteeda ama dhogorta dabiiciga ah. Waxaadna u baahan tahay qof xirfad u leh haddii gurigu yahay guryaha isdul saran ama qeybta sare ee guriga oo qol loo bedelay.

Qiimaha: Ugu dhowaan waxaa ku kacda £180 haddii aad adiga sameysaneysid(DIY) ama £500 haddii qof xirfad u lihi rakibayo(laakiin waa iney lacagta deeqda ahi jirtaa)

Dhaqaale(keyd): waxaa kuu keydsamaya ilaa £110 sanadkii.
Waxaanu kaa codsaneynaa inaad naga soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9966*,** wixii kaloo dheeraad ah.

Fikrado kale oo quwada lagu dhaqaaleeyo

Derbiga dhexdiisa oo la cubo:

- Waxyaabaha wax lagu cubo waxaa la gelinkaraa derbiga dhexdiisa laakiin shaqadaasi waa inuu qabtaa qof ku taqasusay.Haddii aad ku nooshahay guri ijaar ah,waa inaad ogolaasho ka heshaa qofka guriga iska leh,intaadan shaqada bilaabin.

Qiimaha: waa wax ku dhow £500(laakiin waa inaad hesho lacag guno ah) waxaa kuu dhaqaaleysmaya haddaad saas yeesho £90 sanadkii.
Waxaa haboon inaad eegto inaad xaq u leedahay cubida guryaha cabiraadooda.
Waxaa lagaa codsanayaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah 0800 **096 9966*,** wixii dheeraad ah.

Waano quwad dhaqaaleyn ah

Waano lacag la'aan ah oo quwada guriga ku saabsan:

Maka faa'ideysan doontaa sidii gurigaaga iyo quwada sidii aad u dhaqaaleyn lahayd lagaala hadlo?
Telefoonka unbaa lagu dhameeyaa ama iyada oo qoran.
Wada hadalku waxay kuu horseedeysaa habkii aad quwada u dhaqaaleyn laheyd,taasina waxay ku tuseysaa sidii aad lacagta aad bixisid aad u yareyn laheyd.
Si aad u heshid howshan ama wada hadalkan waxaad wacdaa **0800 096 9966*.**

Qadadku waxay furan yihiin 8.00am-8.00pm isniinta-jimcaha, 8.30am-2pm sabtiga.

Gargaarka qadkeena telefoonka ee sida quwada loo dhaqaaleeyo

Iminka wac si aad u hesho waano lacag la'aan ah:

Dadkeena ku taqasusay sida waanooyinka loo bixiyo waxay kusiinayaan waano iyo tilmaamo sidii aad u qorsheynsan laheyd quwada dhaqaaleynteeda .Waxaa lagaa codsanayaa inaad wacdo:
0800 096 9966*.

Qadadku waxay furan yihiin 8.00am-8.00pm isniinta-jimcaha, 8.30am-2pm sabtiga.

Sidii aad ku heli lahayd Lacag deeq ah

Barnaamijkeena la yiraahdo EEC

Waxa laga yaaba inaad hesho lacag deeq ah si aad u bixisid habka aad u dhaqaaleyn laheyd quwada ama waxyaabaha lagu dhaqaaleeyo quwadaee hoos imaada qaadashada quwada yareynteeda (EEC).Wixii warar dheeraad ah wac **0800 096 9966*,** Qadadku waxay furan yihiin 8.00am-8.00pm isniinta-jimcaha, 8.30am-2pm sabtiga

Qorshaha Kululeynta qeybta hore

Haddii aad qaadatid wax ceyr ah,waxaad xaq u leedahay lacag ay dowladu bixiso ee guryaha lagu kululeysto ama kaa caawineysa sidii aad gurigaaga u Cuban lahayd.
Tani way jirtaa haddii aad guriga leedahay ama aad ijaaratey ama nin qaas ah leeyahay.
Waxaa kaloo dhici kartaba inaad xaq u leedahay in laguu rakibo alaabo cusub oo wax kululeeya,wixii kaloo dheeraad ah wac **0800 316 6011*:**

Waano Madaxbanaan

Haddii aad raadineyso caawimaad dheeraad ah.
Yaa kaloo ku caawin kara?

Hay'adahan soo socda waxay taageeraan ama tixgeliyaan sidii quwada loo dhaqaaleyn lahaa,waxayna ku siinayaan waano ama waxqabad loo jeedo.

Meesha waanada quwad dhaqaaleyna laga bixiyo(EEACs)

Meeshani waxay bixisaa waano lacag la'aan ah,dhexdhexaad ah,madaxbanaan dadka guryaha leh iyo dadka ganacsiga yar leh si ay u isticmaali lahaayeen quwad yar iyo si ay lacag yar u bixin lahaayeen.
Waxay kaloo kugu xiriirin karaan hay'adaha lacagaha bixiya,shirkadaha kunturaatka ku qaata iyo meelo kale, haddii aad rabtid in aad ogaato meesha kuugu dhow,waxaad wacdaa:**0800 512 012*.**

Dowladda hoose:

Dowladaada hoose waxaa laga yaabaa iney leedahay qof u qaabilsan quwada sidii loo dhaqaaleyn lahaa,kaasoo ku siinaya waano ku saabsan sidii aad u dhaqaaleyn laheyd quwada.
Waxaa kaloo laga yaabaa inaad waano ka hesho meesha laga xukumo xaafadaada kuwa qaabilsan dadweynaha.
Meesha xafiisku ku yaalo iyo telefoonkooda waxaa laga heli karaa buuga telefoonada ku qoran yihiin ee xaafada.

Waano madaxbanaan

Aasaaskan:

Hay;adahan waxay la xiriiraan horumarinta guryaha wadanka oo dhan,marka lagu daro dhaqaaleynta iyo sameynta.wixii dheeraad ahna la xiriir **01457 891909.**

Howlgalka quwada dalka(NEA).

NEA waa hey'ada dalka ee gargaar ah oo qaabilsan kana welwesha quwada ay u baahanyihiin guryaha ay lacagta yari soo gasho.
Waxay diyaarisaa waxbarasho,tababar ku saabsan waxyaabaha quwada dhaqaaleeya.Wixii dheeraad ah wac **0191 261 5677.**

Hay'ada dhaqaaleynta quwada(EST):

EST waxay kor u qaadaa dhaqaaleynta quwad walba ee la isticmaalo waddankan ingriiska,Kaasoo rajeynaya guud ahaan in la dhimo isticmaalka lana helo meel wanaagsan oo lagu noolaado.
'Quwad dhaqaaleynta' (waa hey'ad dhaqaaleynta quwada qaabilsan) wac: **0207 222 0101.**

Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno

Inaan sameyno wixii aad u baahan tahay.
Waxaanu dooneynaa inaan hubsano dadka macaamiisha nala leh oo dhan in isku si loo dhaqaaleeyo waxqabad fiicana la siiyo,Haddii aad u baahan tahay buugaan oo far waaweyni ku qoran tahay,farta dadka indhoolayaasha ama iyadoo cod duuban ah (CD),waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo kooxda qaaska ah telefoonkan lacag la'aanta ah:**0800 269 450*.**
Macaamiisha aan ingiriiska ku hadlin.

Haddii ingiriis uusan aheyn luqadaada koowaad,waxaad u baahantahay warbixintaan mid waxtarleh,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.**Waxaana kugu wareejin doonaa qadka qaaska ah ee luqadaha,waxaanu leenahay dad ka shaqeeya telefoonada markaanu isku darno iyaga dhexdooda waxay ku hadlaan 100 luqadood oo kala duwan.

Warbixintan waxaynu haynaa iyada oo ku qoran afafkan, Urdu, Bengali, Somali, Gujarati, Turkish, Hindi, Punjabi iyo Welsh.

*telefoonada waa lala socon doona , waana la duubi doonaa ,taasinawaxay ka mid tahay barnaamijka daryeelka macaamiisha. Wicitaanka 0800 waa lacag la'aan marka aad ka weceyso telefoonka guriga ee waddankan ingriiska,laakiin inay lacag kugu xisaabiyaan baa dhici karta haddii aad ka waceyso telefoonka gacantaada shirkada telefoonkaaga,dhammaan nambarada kale waxaa lagu xisaabin qiimaha go'naa .

ˆWaxaa qoray:hay'ad dhaqaaleynta quwada.

EDF Energy waa magac ganacsi ah oo ay isticmaasho EDF customers Plc Reg. No:02228297 xafiiska uu ka qoran yahayna ku yaal 40 Grosvenor Place,London SW1X 7EN,waxaana isla wadaaga ingriiska iyo weelshiga.EDF Energy Customers Plc waxaa isaga oo dhan iska leh oo qiimeeya EDF Energy Plc, mas'uuliyadeeda habka ay wax u qabaneyso iyo soo gudbinta waxqabadka dhamaan EDF Energy waxaa mas'uul ka ah EDF Energy Customers Plc.

Badbaadada Aaska

- Horudhac
- Qatarta aan la arkeyn
- Baarida gurigaaga
- Sidaad noola soo xiriiri lahayd
- Wadooyin kale oo aan kugu caawinkarno

Horudhac

Buugani wuxuu kuu hayaa sidii aad kor ugu qaadi laheyd badbaadada gaaska.

Gurigaaga, waxayna kuu sheegeysaa waxaad sameyn lahay haddii ay arrin degdeg ahi dhacdo.
Buuga xagiisa dambe,waxaad ka heli doontaa telefoono aad wacdo ,haddii aad u baahato waano iyo caawimaad.

Qatarta aan la arkeynin

Badbaada guriga

U ogolow in hawo cusub ay ku wareegato guriga.

Haddii aad isticmaaleysid gaas,saliid ama milanaha culus waxku shaqeeya,Ha xirin meelaha hawadu ka baxdo qolalka ay alaabtu ku jirto.Hawo cusub baa la doonayaa iney ku wareegato si alaabtaadu ay u ahaato Qatar la'aan.

Qatarta ay leedahay gaaska oo meel ka qulqula(dalool)

Aadbey muhiim u tahay inaad ogaataa qatarta ay leedahay Qiiqa suntan ah ee madow(carbon monoxide) iyo gaaska oo meel ka soo qulqula ,ka daloola.

- Qiiqa suntan ah sida badan wuxuu ka yimaadaa haddii alaabta guriga kululeysa ay haleysan tahay haddii aan si fiican loo rakibin ama aan la dhaqaaleyn (taxadirin).

Qatarta aan la arkeyn

- Astaamaha ugu horeeya ee lagu garto qiiqa suntan ah waa :daal,wareer,madax xanuun,xanuun feeraha ah iyo calool xanuun.
- Sunta hadey ku gasho maskaxdaada ayey wax u dhimeysaa.
  Haddii la eego gaaskaaga badbaadadiisa ,taasi waxay hoos u dhigtaa qatarta ay arrintani keento.

Waa maxay qiiqa suntan ah?

Qiiqa suntan ahi Waa qiiq aadan urineynin,midablaheyn waana gaaska keena qatarta degdega ah ee dhimashada ilaa 50 qof iyo dhaawacyo Qatar ah ilaa 200 oo qof waddankan ingriiska sanad walba.Suntan qiiqa ah waxaaba laga yaabaa in dhaqaatiirtu aysan garan Karin Markey dadku hayso.Ilmaha,naagaha uurka leh iyo ilmahooda iyo dadka xididada wadnaha ka jiran ayaa ugu qatarsan.

Qiiqan suntan ah oo aan la urineynin daraadeed,waa inaad guriga ku rakibtaa qalabka sheega haddii guriga ay wax ka qaldan yihiin.
Qalabkan wax ogaada, wuxuu markiiba sheega haddii ay hawqadu ku jirto qiiq badan oo kii suntan ahaa ah.Waxaadna aad u hubsataa qalabka aad ku dhejineyso gurigaaga inuu ahaado mid ka qiimeysan ama laga yaqaano ingriiska iyo yurubta kale.

Baaridda gurigaaga

Baaridda badbaadada gaaska:

Xaq ma u leedahay in lacag la'aan laguugu baaro gurigaaga?

Haddii aad tahay macaamiisha gaaska gurina aad leedahay,markaaas waxaan kuu ogolaan karnaa inaan lacag la'aankuugu baarno.

Waxaad xaq u leedahay in lacag la'aan laguugu baaro gurigaaga haddii:

- Aad qaadaneysid wax ceyr ah aadna leedahay cunug ka yar shan sano,ama
- Waxaad tahay qof waayeel ah,curyaan ah ama cudurwayn aan laga kaceyn iyo qof keligiis nool,ama
- Waxaad tahay qof waayeel ah,curyaan ah ama cudur wayn aan laga kaceyn ,lanoolna dad kale oo da'dooda weyn tahay oo kuligood da'weyn,curyaan ah,cudur xun qaba da'dooduna ka yartahay 18. iyo
- Adiga ayaa na weydiista inaan gurigaaga kuu baarno.
- Adigoon gurigaaga lagu sameyn wax baarid ah laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafey.

Baaritaanka lagu ogaanaayo gurigaaga waxaa lagu sameynayaa gaaska iyo waxyaabaha gaaska ku shaqeeya,lacag la'aan waxaana sameynaya dad qibrad u leh oo ah injineer gaas.

Baarida gurigaaga

Maxaa dhacaya haddii aad ku dhacdid baaritaanka?
Haddii alaabtaada ay ku dhacaan baaritaanka, waa lakala furayaa waxaana lagu dhejinayaa warqad ku qoran tahay iska ilaali ma wanaagsana.Ha' isticmaalin alaabtan ilaa la hagaajiyo ama uu sameeyo dadka ka qoran shirkada la yiraahdo(CORGI) oo injineer ah.Wixii waano ama faahfaahin dheeraad ah waxaad wacdaa laynka qaaska ah ee dadka waxsameeya: **0800 269 450*.**

Baaritaanka gurigaaga

Hadii aadan xaq u laheyn inaan gurigaa baarno?

Haddii aadan xaq u laheyn in lacag la'aan lagu baaro gurigaaga, waxaad xaqiijisaa in qalabkaaga gaaska ku shaqeeyo uu mar walba eego injineerada ka qoran(CORGI)ee wax rakiba.

Ma guri ijaar ah ayaad degan tahay?

Haddii aad guri ijaar ah aad degan tahay,ninka guriga iska leh ayaa mas'uuliyadiisu tahay si uu u hubsado alaabta gaaska ku shaqeeya iney wanaagsan tahay,sanad walbana in la baaro.

Sidaad noola soo xiriiri laheyd

Haddii aad urisid gaas ama aad u maleysid in gaas uu meel ka soo baxayo,waxaad waceysaa wakaalada xooga meesha degdega waxaadna waci kartaa **0800 11 999*** qadku wuxuu furan yahay 24 saacadood maalintii, maalin walba xataa maalmaha feestooyinka.

Macaamiisha qadka telefoonka wax weydiiya

Hadii aad guryaha aad u soo waceyso waxaad weci kartaa telefoonka lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.**

Haddii aad dooneysid inaad noo soo qorto warqad waxaa lagaa codsanayaa inaad ku soo dirtid:

Correspondence Manager
EDF Energy Plc
FREEPOST 3814
LONDON
WC1V 6AJ

Waxaad kaloo nagala soo xiriiri kartaa wadada internetka websaytka
www.edfenergy.com

Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno.

Inaan sameyno wixii aad u baahan tahay.
Waxaanu dooneynaa inaan hubsano dadka macaamiisha nala leh oo dhan in isku si loo dhaqaaleeyo waxqabad fiicana la siiyo,Haddii aad u baahan tahay buugaan oo far waaweyni ku qoran tahay,farta dadka indhoolayaasha ama iyadoo cod duuban ah (CD),waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo kooxda qaaska ah telefoonkan lacag la'aanta ah:**0800 269 450*.**

Macaamiisha aan ingiriiska ku hadlin.
Haddii ingiriis uusan aheyn luqadaada koowaad,waxaad u baahantahay warbixintaan mid waxtarleh,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.**Waxaana kugu wareejin doonaa qadka qaaska ah ee luqadaha,waxaanu leenahay dad ka shaqeeya telefoonada markaanu isku darno iyaga dhexdooda waxay ku hadlaan 100 luqadood oo kala duwan.
Warbixintan waxaynu haynaa iyada oo ku qoran afafkan ,Urdu,Bengali,Somali,Gujarati,Turkish,Hindi,Punjabi iyo
Welsh.

*telefoonada waa lala socon doona , waana la duubi doonaa ,taasina waxay ka mid tahay barnaamijka daryeelka macaamiisha. Wicitaanka 0800 waa lacag la'aan marka aad ka weceyso telefoonka guriga ee waddankan ingriiska,laakiin inay lacag kugu xisaabiyaan baa dhici karta haddii aad ka waceyso telefoonka gacantaada shirkada telefoonkaaga,dhammaan nambarada kale waxaa lagu xisaabin qiimaha go'naa

Waxaa qoray:hay'ad dhaqaaleynta quwada

EDF Energy waa macac ganacsi ah oo ay isticmaasho EDF Customers Plc Reg. No:02228297 xafiiska uu ka qoran yahayna ku yaal 40 Grosvenor Place,London SW1X 7EN,waxaana isla wadaaga ingriiska iyo weelshiga.EDF Energy Customers Plc waxaa isaga oo dhan iska leh Oo qiimeeya EDF Energy Plc, mas'uuliyadeeda habka ay wax u qabaneyso iyo soo gudbinta waxqabadka dhamaan EDF Energy waxaa mas'uul ka ah EDF Energy Customers Plc.

Haddii aad Cabasho Sameyneysid.

- Horudhac
- Waxaanu u joognaa inaan ku caawino
- Waano Madaxbanaan
- Wadooyin kale ee aan kugu caawin karno

Horudhac

Halka EDF Energy,waxaanu isku xilkqaadnay inaan idiin soo bandhigno,

Waxqabadka ugu wanaagsan, Haddii aadan ku faraxsaneyn waxaanu qabano.Waxaanu kaa codsaneynaa inaad noo sheegtid,waxaanu isku dayeynaa inaan xalino sida ugu dhaqsiyaha badan.

Waxaanu u joognaa inaan ku caawino

Habka cabashada loo sameeyo.
Haddii aad cabasho qabto,fadlan la soco talaabooyinkan:
Talaabada ugu horeysa,waxaanu kaa codsaneynaa inaad wacdo dadkayaga heysta tababarka sare ee waaniya dadka waxnaga iibsada telefoonka lacag la'aanta ah ee **0800 096 900*** si aad ugala hadasho dhibka ku haysta.
Weli kuma faraxsanid?
Haddii dadka annaga noo shaqeeya ee caawiya dadweynaha waxnaga iibsada ay xalin waayaan waxaad ka cabaneyso ama gebi ahaanba aadan ku faraxsaneyn sida wax loo dhameeyey,waxaad arrintaa horey ugu wadi kartaa adoo weydiiya inaad la hadasho ninka xukuma kooxda dadweynaha caawisa.
Weli miyaadan gebi ahaanba ku qanacsaneyn?
Haddii aadan weli ku qanacsaneyn,waxaad codsankartaa in la eego arrintaada gebi ahaan.
Habkan ayaad u sameynkartaa:

- Waxaad warqad u qori kartaa ninka xukuma kuwa dadka caawiya:
  EDF Energy
  Freepost 3815
  Hove
  BN3 5AW

- Emailing
  ManagingDirectorofCustomerServices@edfenergy.com

Waxaanu u joognaa inaan ku caawino

Waxaanu isku dayeynaa inaan ku eegno arintaada muddo toban cisho ee kuwa la shaqeeyo ah.
Haddii aad qabto cabasho ku saabsan habka aan wax u gadno,waxaad heli kartaa magdhow bixinaya EDF Energy,markaan arrintaada oo dhan soo baarney ama eegnay.

Weli arrintaada lama xallin?
Kadib markaad la socotay habkii loo cabanayey,welina aadan ku qanacsaneyn habkii aan wax u dhameyney.Waxaad la xiriiri kartaa
Energy Supply Ombudsman adigoo wacaya **0845 055 0760.** Monday-Friday 9am-5pm
Ama waxaad geli kartaa internetka: www.energy-ombudsman.org.uk

Kuwani waa dad lacag la'aan ah oona madaxbanaan quwadna u haysta iney xaliyaan dadka dhibban,Haddii aanu nahay EDF energy waxaanu gebi ahaanba taageersannahay habkan cusub ee wax loo xaliyo waxaadna warqad ugu diri kartaa;
Energy Supply Ombudsman
PO Box 966

Warrington
WA4 9DF

Waano Madaxbanaan

Haddii aad raadineyso caawimaad dheeraad ah.

Wixii waano dhexdhexaad ah waxaad la xiriiri kartaa kuwa la yiraahdo **energywatch,**waa kuwa eega shirkada quwadda dadka cabashada u soo gudbiya,waxayna bixiyaan waano iyo gacan qabasho dhexdhexaad ah oo lacag la'aan ah.Waxaadna ka wici kartaa teefoonka **0845 906 0708** ama waxaad warqad ugu diri kartaa:

Regional Director
Energywatch
3rd Floor, Artillery House
Artillery Row
London SW1P 1RT

Haddii aadan wax maqleyna waxaad kula xiriiri kartaa energywatch telefoonka sida teebka loo garaaco,halkan **018001 08459 060708.**

Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno

Inaan sameyno wixii aad u baahan tahay.
Waxaanu dooneynaa inaan hubsano dadka macaamiisha nala leh oo dhan in isku si loo dhaqaaleeyo waxqabad fiicana la siiyo,Haddii aad u baahan tahay buugaan oo far waaweyni ku qoran tahay,farta dadka indhoolayaasha ama iyadoo cod duuban ah (CD),waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo kooxda qaaska ah telefoonkan lacag la'aanta ah:**0800 269 450*.**

Macaamiisha aan ingiriiska ku hadlin.
Haddii ingiriis uusan aheyn luqadaada koowaad,waxaad u baahantahay warbixintaan mid waxtarleh,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.**Waxaana kugu wareejin doonaa qadka qaaska ah ee luqadaha,waxaanu leenahay dad ka shaqeeya telefoonada markaannu isku darno iyaga dhexdooda waxay ku hadlaan 100 luqadood oo kala duwan.

Warbixintan waxaynu haynaa iyada oo ku qoran afafkan ,Urdu,Bengali,Somali,Gujarati,Turkish,Hindi,Punjabi iyo Welsh.

*telefoonada waa lala socon doona , waana la duubi doonaa ,taasina waxay ka mid tahay barnaamijka daryeelka macaamiisha. Wicitaanka 0800 waa lacag la'aan marka aad ka weceyso telefoonka guriga ee waddankan ingriiska,laakiin inay lacag kugu xisaabiyaan baa dhici karta haddii aad ka waceyso telefoonka gacantaada shirkada telefoonkaaga,dhammaan nambarada kale waxaa lagu xisaabin qiimaha go'naa .

EDF Energy waa macac ganacsi ah oo ay isticmaasho EDF Customers Plc Reg. No:02228297 xafiiska uu ka qoran yahayna ku yaal 40 Grosvenor Place,London SW1X 7EN,waxaana isla wadaaga ingriiska iyoweelshiga.EDF Energy Customers Plc waxaa isaga oo dhan iska leh Oo qiimeeya EDF Energy Plc, mas'uuliyadeeda habka ay wax u qabaneyso iyo soo gudbinta waxqabadka dhamaan EDF Energy waxaa mas'uulka ah EDF Energy Customers Plc.

Bixi oo Isticmaal.

- Horudhac
- Ma mid ku anfacaa mitirka lacagta lagu shubo
- Haddii ay wax halaabaan
- Wanaagaaga
- Mitirka oo la saxayo ama mitirka oo la bixinayo.
- Sidii aad noola soo xiriiri lahayd
- Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno

Horudhac

Habkan iska bixixnta wuxuu kuu ogalaanayaa inaad bixiso oo isticmaashid gaaskaaga iyo korontadaada si aad xakamaha ugu qabatid quwada aad isticmaasho iyo qarashka.

Buugani wuxuu kuu tafatirayaa faa'iidooyinka uu leeyahay mititkan aad lacagta ku shubaneysid,wuxuu kaloo kuu sheegayaa sidii aad u heli lahayd waxqabadka oo dhan,taasoo ay isticmaalaan kumanaan dadka macaamiisha nala leh ee degan ingriiska(UK).

Makugu haboon yahay mitirkan iska bixi oo isticmaal

Waxyaabaha aad u baahan tahay oo dhan ee ku saabsan mitirka markaad lacag bixiso aad isticmaaleysid.

Faa'iido badan baa kuugu jirta haddii laguu rakibo mitirkan aad lacagta bixineysid intaadan isticmaalin-laakiin waxaa kaloo uu leeyahay qasaarooyin,taasi waxay tahay adigoo lagaaga baahan yahay inaad xusuusnaato oo aad lacag ku soo shubto.

Waxaanu rabnaa inaan ku siino shaqada ugu wanaagsan ee aan qabano ee ku aadan waxyaabaha aad u baahantahay. Iyo inaaan kugu dhiirigelino inaad miisaanto dhibcaha isku darka ah iyo dhibcaha kala jarka ah si aad adiga go'aan u gaarto.

Sida macaamiil badan oo aanu leenahay oo kale,waxaa laga yaabaa inaad dareento dhibcaha wanaagsan iney ka culus yihiin kuwa xun.

Faa'iidada uu leeyahay mitirkan lacagta lagu shubto.

- Adiga ayaa xukumaya waxa gaas iyo koronto aad isticmaaleysid iyo lacag intee la'eg baad isticmaaleysaa.
- Kuuma imanayaan seddexdi bilood halmar wixii lacag aad isticmaashay, nagamana codsan doontid inaad qeyb bixiso.
- Waraaqa joogtada ee kuu imaanaya ee ay ku qoran yihiin waxaad isticmaashay.

Makugu haboon y ahay mitirkan iska bixi oo isticmaal

- Waxaa jirtaa hab fududeyn ah haddii ay ay wax degdeg ahi dhacaan oo mitirkaagii lacagi kuugu shubmi weydo furaha ama karaka si kastaba ha noqotee.
- Hadii lacag deyn ah lagugu leeyahay,waxaad isticmaali kartaa mitirkaaga si aad noogu gudid deynta lagugu leeyahay.Lacagtana waa laguu kala dheereynaya qyebqeyb baad u bixineysaa ee adiga ku anfacda,lacag lagu heshiiyey ee aad awoodid,wax dulsaar ahina ma jiraan.

Makugu haboon yahay mitirkan iska bixi oo isticmaal

Faa'iido La'aantiisa:

- Haddii aad ka maqnaaneysid maalmo gurigaaga,waa inaad xusuusnaataa inaad buuxsatid kaarkaaga ama furaha si aad ugu shubto mitirka.sababtuna waxay tahay tani waa lacagta lagaaga baahan yahay inaad ku bixiso isticmaalka maalin walba,iyo wixii deyn ah ee aad bixineyso.Haddii aadan lacag ku filan ku soo shubin intaadan meel aadin, Makiinadaha la rabo iney shidnaadan marwalba way kaa damayaan tusaale ahaan(talaajooyinka).
- Waa inaad ka soo buuxisaa furahaaga ama kaarkaaga meelaha laga soo buuxsado mararka qaarkood kan kuu dhowi waa xiran yahay.

Haddii ay wax qaldamaan (halaabaan)

Maxaa dhacaya haddii mitirkaagu shaqeyneyn?

- Haddii mitirkaaga lacagta lagu shubo uusan shaqeyneyn,waxaanu kuu haynaa shaqaale shaqeeya 24 saacadood gurigana kuugu iman kara.Waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah: **0800 015 1733*** mar allaale iyo markaad aragto iney wax qaldan yihiin.
- Shaqaalaha telefoonka wuxuu ku weydiin su'aalo dhowr ah si uu u ogaado dhibkaaga ama meesha wax ka haleysan yihiin.
- Haddii aadan heleynin koronto iyo gaas,sababtuna ay tahay infuraha ama kaarku haleysan yahay,waxaa laga yaabaa inaan u baahannahay in gurigaaga la yimaado ama waxa dhici kartaba inaan si fudud boosto kuugu soo dhigno kaarkaaga ama furahaaga cusub.
- Fadlan xusuusnow haddii galabtii aad soo wacdo oo aad noo sheegto iney wax kaa haleysan yihiin,shaqaalaheenu wuxuu u baahan yahay inuu kuu yimaado habeenkii.Haddii taasi ayan habooneyn waxaanu kaa codsaneynaa inaad wacdo kuwa qaabilsan mitirada bixi oo isticmaal,telefoonkan lacagla'aanta ah: **0800 015 1733*** annagana waxaanu kuu diyaarin doonaa adiga ballan kale.
- Fadlan xasuusnow haddii dhibka ku haysta uusan ahayn furaha ama karaka waxaanu kaa dooneynaa inaad bixiso imaatinkeena.

Haddii ay wax qaldamaan (halaabaan)

Maxaa dhacaya haddii aad soo buuxin weydo furahaaga ama kaarkaaga?

Haddii aad gaari weydo meelaha wax laga buuxiyo oo gaskii ama korontadii kaa dhamaadeen,waxaad isticmaali kartaa lacagta deynta ah ee mitirkaaga ku jirta.

Hadii ay lacagtaada hoos u dhacdo waxaad maqleysaa dhawaaq digniin ah.Furaha uun geli ama karaka si aad u siideyso lacagta deynta ah.Mitirkan oo kale inta badan waxaa uu hayaa £6 oo deyn ah.(lacagtani mararka qaarkood waa kala badan tahay,waxaanu kaa codsaneynaa inaad nala soo xiriirtid si aad u ogaatid)

Faa'idooyinka xaqiiqada ah ee lacagta degdega ee deynta

- Macaamiil badan waxay ogaadeen lacagtan deynta ah waxay ku heyneysaa oo keliya seddex maalmood' quwada caadiga ah ee la isticmaalo. Tanina waxay ku siinaysaa waqti aad ku soo buuxsato furahaaga ama kaarkaaga.
- Waa inaad gudaa lacagtan degdega ah ee deynta ah,Waxaa kale oo lagaaga baahanyahay inaad soo buuxsatid lacag kugu filan ilaa laga gaarayo waqtiga kale ee aad dooneysid inaad soo buuxsato furahaaga ama kaarkaaga.
- Waxaad kaliya oo aad isticmaashaa lacagtan degdega ah haddii laga maarmi waayo oo keliya.

Haddii ay wax qaldamaan (halaabaan)

- Badbaadadaada daraadeed,waxaanu kugu waanineynaa inaadan isticmaalin lacagtii degdega ahayd oo dhan.Haddii aad sameysid oo korontadii ama gaaskii uu kaa

damo,**Fadlan xaqiiqso inaad demisid waxyaabaha gaaska iyo korontada ku shaqeeyo oo dhan** inta aadan furihii ama kaarkii aad soo kaarikeeysey aadan gelinin mitirka.

Haddii aad ka soo buuxin waydo furahaaga ama kaarkaaga meelihii laga soo buuxin jirey ama boostada sababtuna ay tahay iney haleysan yihiin daraadeed,waxaanu kaa codsaneynaa inaad noo soo sheegtid adigoo wacaya qeybta bixi oo isticmaal macaamiisheeda telefoonka lacag la'aanta ah ee caawimada lagugu tusayo boga 11 buugan.Waxaanu kuu sheegi doonaa meesha aad ka heleysid meesha kuugu dhow ee kugu haboon aad ka buuxsan doontid. Meelaha wax laga buuxsado ,caadi ahan waxay sameeyaan haddii makiinadu ka haleysan tahay 4 saacadood ee la shaqqeyo gudahooda oo ay ogaadaan in qalad uu jiro.

Wanaagaaga

il gooni ah ku eeg inaad iska demiso adiga.

'inaad iska demiso'Waa erayo aan isticmaalno markaad joojisid in aad kaarikeyso furahaaga ama kaarkaaga,taasoo joogsata quwadii kuu imaaneysey.
Tani waxay dhacdaa oo keliya marka macaamiisha ay awoodi waayaan iney kaarikeeyaan mitirkooda.
Waa inaad il gooni ah ku eegtaa iska deminta badbaadadaada awgeed. Haddii aadan soo kaarikeyn furahaaga ama kaarkaaga in mudo ah,waxaanu isku dayeynaa inaan eegno koontadaada si aanu isugu dayno waxa dhacay.

- Waxaanu kaa waani karnaa sidii aad u yaryareysan lahayd lacagta aad ka bixisid gurigaaga waxyaabaha aad isticmaashid iyo sidii aad u dhaqaaleyn lahayd lacagtaada taasoo ah sidii aad u dhaqaaleyn lahayd quwada.
- Waxaa kaloo kugu xiriirin karnaa dadka waxbixiya, sadaqo bixiyayaal iyo dad lacag la'aan ku shaqeeya oo ku caawin kara.

Ku celinta sidii hore ama ka saarida mitirka

Ku celinta sidii hore ee mitirka lacagta lagu shubo:

Waxaa run ah inaadan rabin inaad bixisid lacag qof kale lagu leeyahay.Marka haddii aad guri u soo guurtid aadna aragtid in gurigu leeyahay mitirkii lacagta lagu shubayo,waxaanu kaa codsaneynaa inaad nala socodsiisid.Waxaa laga yaaba inan imaano oo sidii hore ku soo helino mitirka,fadlan na soo wac si aan waqti kuugu qabano,waxaadna na siisaa haddii ay ugu yartahay 2maalmood ee kuwa la shaqeeyo ah digniin.

Hadii qiimaha korontada ama gaaska uu is bedelo,furahaaga ama kaarkaaga waxaa lagu kordin doonaa ama loo gudbin doonaa marka kale aad buuxisid. Haddii aanu ururineyno deyn aan kugu leenahay kana qaadaneyno mitirka,mitirada badankood iyaga ayaa isku soo celiya marka deyntu kaa dhamaato.Haddii nooca mitirka aad heysatid uu yahay kii aan isku soo celineynin sidiisi hore,waxaanu kuu sameynaynaa ballan aanu kuugu soo celino mitirkaaga sidiisi hore.

Maxaa dhacaya haddii mitirkaaga lacagta lagu shubo lagaa qaato?
Haddii aan rakibno mitirka lacagta lagu shubo,Waxaan caadi ahaan kaa filaneynaa inaad heysato 12 bilood oo keliya iyo inaad ku dhameeyso lacagta deynta ah ee aan ku darney mitirka.

Haddii aad iska bixisay deynta,oo mitirkan lacagta lagu shubo uusan kugu habooneyn,waxaanu kaa codsaneynaa inaad nala soo hadashid si aan uga wada hadalno hab kale ood wax ku bixiso.Haddii aad rabtid inaan qaadano mitirkan lacagta lagu shubo,ma bixineysid lacag haddii aan saas sameyno,laakiin waa inaan ka wada hadalnaa wixii lacag ah ee lagugu leeyahay ee ku hartay mitirka.

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd.

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd

Macaamiisha leh mitirka lacagta lagu shubo telefoonka laga caawiyo:

Haddii aad u baahan tahay warbixin guud ahaaneed oo ku saabsan mitirka wax lagu shubo waxaa lagaa codsanayaa inaad wacdo telefoonka lacag la'aanta ah: **0800 015 1733*.**
Waxaa nala heli karaa 8.00am-8.00pm Isniin –jimco iyo
8.30am-2pm sabtiga.

Warbixin guud ahaaneed telefoonka laga caawiyo

Warbixinta aad u baahan tahay ee guryaha,waxaad wacdaa telefoonka lacag la'aanta ah:**0800 096 9000*** waxaa nala helaa 24 saacadood maalin walba,xataa maalmah fasaxa.

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd.

Haddii aad dooneysid inaad warqad noo soo qortid fadlan waxaad u soo dirtaa waraaqaha:

Correspondence Manager
EDF Energy Plc
FREEPOST 3814
LONDON
WC1V 6AJ

Waxaa kaloo nagala soo xiriiri kartaa wadada internetka.
www.edfenergy.com

Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno.

Inaan sameyno wixii aad u baahan tahay.
Waxaanu dooneynaa inaan hubsano dadka macaamiisha nala leh oo dhan in isku si loo dhaqaaleeyo waxqabad fiicana la siiyo,Haddii aad u baahan tahay buugaan oo far waaweyni kuqoran tahay,farta dadka indhoolayaasha ama iyadoo cod duuban ah (CD),waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo kooxda qaaska ah telefoonkan lacag la'aanta ah:**0800 269 450*.**

Macaamiisha aan ingiriiska ku hadlin.
Haddii ingiriis uusan aheyn luqadaada koowaad,waxaad u baahantahay warbixintaan mid waxtarleh,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.**Waxaana kugu wareejin doonaa qadka qaaska ah ee luqadaha,waxaanu leenahay dad ka shaqeeya telefoonada markaanu isku darno iyaga dhexdooda waxay ku hadlaan 100 luqadood oo kala duwan.

Warbixintan waxaynu haynaa iyada oo ku qoran afafkan,
Urdu,Bengali,Somali,Gujarati,Turkish,Hindi,Punjabi iyo Welsh.

*telefoonada waa lala socon doona , waana la duubi doonaa ,taasina waxay ka mid tahay barnaamijka daryeelka macaamiisha. Wicitaanka 0800 waa lacag la'aan marka aad ka weceyso telefoonka guriga ee waddankan ingriiska,laakiin inay lacag kugu xisaabiyaan baa dhici karta haddii aad ka waceyso telefoonka gacantaada shirkada telefoonkaaga,dhammaan nambarada kale waxaa lagu xisaabin qiimaha go'naa.

EDF Energy waa macac ganacsi ah oo ay isticmaasho EDF customers Plc Reg. No:02228297 xafiiska uu ka qoran yahayna ku yaal 40 Grosvenor Place,London SW1X

7EN,waxaana isla wadaaga ingriiska iyoweelshiga.EDF Energy Customers Plc waxaa isaga oo dhan iska leh Oo qiimeeya EDF Energy Plc, mas'uuliyadeeda habka ay wax u qabaneyso iyo soo gudbinta waxqabadka dhamaan EDF Energy waxaa mas'uulka ah EDF Energy Customers Plc.

Bixinta lacagta quwada ee aad isticmaasho

- Horudhac
- Wadooyin aad ku bixineyso gaaskaaga iyo korontadaada
- Haddii ay dhib kugu noqoto bixinta Lacagta
- Habab kale oo aad ku bixin kartid
- Sidaad isaga ilaalin laheyd in lagaa jaro
- Sidaad noola soo xiriiri lahayd

Horudhac

Buugani waxa uu ku tusayaa warbixino kala gedisan oo ah wadooyin aad adiga

Ku bixin kartid lacagta gaaska iyo korontada,waxaanu ogolnahay wadooyin badan oo wax lagu bixin karo taasoo aanu ka dhigayno hab adiga kuu fudud oo aad ku bixin karto lacagtaada.

Waxaad doorataa mida adiga kugu haboon oo keliya.

Wadooyin aad ku bixineyso gaaskaaga iyo korontadaada

Waxaad u bixin kartaa:

Bilwalba oo bangigaaga lagala baxo(Monthly Direct Debit).

- Bixintaanka aad bixineyso tan bangigaaga lagala baxayo bil walba waa wax fudud waadna ku farxi doontaa sida loo diyaariyo markaad dooneysid habkan.Waxaad bixinkartaa bilwalba maalinta aad adiga dooneysid oo adiga kuu haboon waxaanu weliba ku siineynaa iyadoo sicirkii wax laga dhimay ilaa iyo £50.40 sanadkii.Waxaad wacdaa oo keliya **0800 096 9000*** ama internetka www.edfenergy.com.

  ˆ£50.40 Lagaa dhimayo sanadkii waa adoo isku qaatay gaaska iyo korontada oo aad bixiineysid habka bangigaaga wax loogala baxaayo,taasoo kaa dhimeysa £25.20 sanadkii.Waxaa kaloo ku darsamaaya £16.80 sanadkii inta aad ku bixineysid habka bangiga lagala baxayo gaaska iyo £8.40 sanadkii oo aad habkaas ku bixineysid korontada.Lacagtaan lagaa dhimayo shaqo kuma laha alaabada qaarkood(tusaale ahaan waxyaabao laga gato internetka ama alaabo badan oo aad iibsatey)

Wadooyin aad ku bixineyso gaaskaaga iyo korontadaada

Seddexdii bilood hal mar oo bangiga lagala baxayo:

- Waxaa laga yaabaa iney adiga kuu roontahay inaad bixisid seddexdii bil halmar oo bangiga lagala baxayo.
  Wax lacag ah oo lagaa dhimayo ma jiro,Hase ahaatee lacagta waxay ka soo baxeysaa bangigaaga si joogto ah 14 maalmood kadib markaanu warqada lacagta kuu soo dirno.Taasoo kuu badbaadineysa waqti shiddo.

Lacag cadaan ah ama jeek haddii aad ku bixisid lacagta:
Waad ku bixin kartaa seddexdii biloodba marka ay lacagta lagaa doonayo kuu imaato,bangigaaga inata aad la tagto ku bixi lacag caddaan ah ama jeek.Waxaanu kaa codsaneynaa in jeeka aad ku qortid EDF Energy Costomers PLC iyo inaad xaga dambe uga qortid lambarka akaawntigaaga.
Kaarka quwada(EnergyCard)

- Kaarkan waxa uu kuu ogalaanayaa inaad lacagta u qaybisid sanadka oo adhan si isla eg.Waxadna kaarkan ku isticmaali kartaa boostada ama meel walba oo wax laga bixiyo,Lacag isku mid ah ama kala duwan marwalba oo aad tagto meesha.
  Lacagtii soo hartaana waa inaad iydoo dhan bixisaa marka ay kuu soo dhacdo warqada lacagta lagu bixinayo (bill).

Mitirka lacagta lagu shubo

- Kani waxa uu kuu ogolaada inaad gaaskaaga iyo korontadaada aad bixisid markaana aad isticmaashid, taasoo kaa caawineysa inaad lacagtaada xukunto.

Habka qolada sedexaad ee waxlagaaga jarayo(Third Party Deduction Scheme)

- Haddii aad qaadatid lacagta gunada ee dowlada(cayr) waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay inaad si toos ah ugu darsanto kooxdan,si lacagta lagaa rabo looga goosto lacagta cayrta.

Haddii ay dhib kugu noqoto bixinta Lacagta.

Ma dhibay kugu tahay inaad lacagta bixiso?

Haddii aad ka walwalsantahay sidii aad ku bixin lahayd gaaskaaga ama korontadaada,Ha is dhihin waxaad sugtaa inta ay warqadu ka soo dhaceyso markaasna la hadal. Sida waqti fiican aad noola soo hadasho,anagana si dhaqsi badan baanu waxkuula qabaneynaa.

Haddii aad noosheegtid waxa ku haysta,waxaanu ku heshiin doonaa waxa aad bixin kartid,marka aanu eegno inta aan kugu leenahay ,mustaqbalka waxa aad isticmaali doontid iyo waxa aad awoodid(Taasoo aan eegayno inaan deyn hore kugu lahayn)

Macaamiisha dhibka ay ku tahay bixinta lacagta ay isticmaaleen,waxaanu u soo jeedin lahayn iney isticmaalaan mid ka mid ah habkan wax lagu bixiyo:

- Lacag joogto ah oo aad bixineyso taasoo lagu heshiinayo adigana aad awoodid.
- In lagu rakibo gurigaaga mitirka lacagta lagu shubo,kaasoo kuu badbaado ah wax suurta galna ah.
- Inaad ku bixisid habkii ahaa in ceyrtaada laga goosto
  Eeg bogga 7 waxii faahfaahin ah.

Haddii ay dhib kugu noqoto bixinta Lacagta

Haddii aad ka dooratay waxyaabahii ku qornaa liiska naga soo horjeeda,waxaanu ku weydiin doonaa inaad ismaamuli kartid waxaanu kuu sameyney,si aad si joogta ah aad ugu isticmaashid gaaskaaga iyo korontadaada.

Haddii aad si joogta ah u bixinweydid,waxaanu kaa codsaneynaa inaad si degdeg ah noola soo hadashid iyo waxaa laga yaabaa inaan isku raacno inaad bixisid lacag ka duwan tii hore ama waxaanu kuu ogolaan doonaa inaad si kale ku bixisid.
Xafiiska xaafadaada ee Citizens Advice Bureau ama xafiisyada waanooyinka ku saabsan dhaqaalaha laga helo waxay ku siinayaan waano ku saabsan dhibka kaa heysta dhaqaalaha.Wixii ku saabsan arrintooda waxaad ku arki kartaa xaga dambe ee buugan.

Habab kale oo aad ku bixin kartid.

Habka qolada sedexaad ee waxlagaaga jarayo(Third Party Deduction Scheme)

Haddii lacag lagugu leeyahay ee quwada aad isticmaashay ah oo aad qaadatid cayrna(Income Support), lacagta dadka duqeyda ah(Pension Credit) ama lacag kale oo cayr

ah,waxaa dhici karta inaad ku soo biirto habkan lagu magacaabo lacag ka jarida qofka seddexaad(Third Party Deduction Scheme).

Tani waxay tahay iyadoo lacagtaada ceyrta la soo jaro annagana toos naloo siiyo.Si aad uga qeyb gasho dadkan waxaa haboon inaad la xiriirto Wasaarada shaqada iyo ceyrta(DWP). Wixii dheeraad ah waxaad geli kartaa internetka
www.dwp.gov.uk.

Haddii aad noo sheegtid inaad la xiriirtay kuwa ceyrta(DWP) ama dad kale oo ka caawiya dadka lacagaha,taasoo ku saabsan lacagtii aan kugu lahayn,anagana waa la hadli karnaa,haddii ay tani ku caawineyso,waxaa muhiim ah inaad noo soo sheegtid.
Habab kale oo aad ku bixin kartid.

Lacag lagaa haynayo oo laysku ilaalinayo:

Waxaa dhacda, tusaale ahaan in hadda ka hor ay dhib kugu
noqotay inaad bixiso lacagtii lagugu lahaa ee gaaskaaga iyo korontadaada.
Waxaa laga yaaba inaan ku weydiino lacag lagaa haynayo inta aanan koronto ama gaas guriga soo gelin.

Waxaa haboon inaan ku weydiino inaad lacagta ku bixisid hab la hubo inaan annaga lacagteena heleyno.
Habkani waxaad u sameyn kartaa dhowr nooc oo kala ah:

- Inaad bixiso lacag cadaan ah ee lagaa haynayo.
- Inaad ka mid noqoto dadka u bixiya habka bangiga lagala baxayo(Direct Debit)
- Inaad doorato inaan kuugu xirno mitirka lacagta lagu shubo, Haddii uu ku haboon yahay,wax macquul ahna ay tahay.

Habab kale oo aad ku bixin kartid.

Waxaa laga yaabaa inaan kuu xirno mitirka lacagta lagu shubo:

Mitirkan lacagta lagu shubo waxa uu kuu ogolaadaa inaad bixisid gaaskaaga iyo korontadaada oo aad isticmaasho. Taasoo aadan u baahneyn inaad bixiso lacag seddexdii bilood halmar iyo inaad marwalba soo aqriso mitirkii halka uu joogay,mitikan lacagta lagu shubo waxaa uu kuu horseedaa inaad lacagtaada xukunto.

- EDF energy mitikeeda lacagta lagu shubo,macaamiisheeda waxay bixiyaan lacagta ay bixiyaan dadka seddexdii bilood hal mar bixiya.
- Si toos ah ayaad u xakameynkartaa waxa aad isticmaaleysid gaas iyo koronto iyo waxa lacag aad isticmaasho.

Maxaa dhacaya haddii qof ka mid ah macaamiisha uu diido in loo rakibo mitirka lacagta lagu shubo?
Mararka qaarkood,haddii lacag deyn ah oo lagugu lahaa aadan bixin, waxaanu go'aan ku gaarnaa inaan kuu xirno mitirka lacagta lagu shubo.
Haddii qof macaamiil nala ah uu diido inaan galno gurigiisa si aan ugu rakibno mitirka,waxaanu codsi u qoran karnaa maxkamada si ay noo siiso warqadaa noo ogolaaneysa inaan guriisa galno(warrant of entry).
Tani waxay na siisaa awood ama ogolaasho inaan galno gurigaaga adigoon ogolayn si aan ugu rakibno mitirka lacagta lagu shubo.
Xataa haddii mitirka uu yahay banaanka waa inaan galnaa gudaha, xaqiiqdii waxaanu mar walba u dirnaa warqad markaanu u baahanahay inaan galno guriga ,anaga waxaa noo roon inaan isku raacno ballan macaamiisheena.

*Macaamiisha waxaa laga codsanayaa inay bixiyaan dhamaan lacagta ku kacday deyntii lagaa soo qaadayey iyo warqaddii aan maxkamada ka soo qaadney lacagteeda.

Habab kale oo aad ku bixin kartid.

Haddii ay wax iska kaa bedelaan, waxaanu kaa codsaneynaa inaad nala soo xiriirtid

Haddii ay wax isbedelaan,Haddii ay tahay lacag awgeed ama nafsad ahaantaadaba ay wax isbedelaan,waxaanu kaa codsaneynaa inaad nala soo xiriirtid.Waxaanu si farxad leh kaala hadli doonaa inaad hab kale ku bixisid(tusaale ahaan waxyaryar oo joogta ah).Waxaanu doonaynaa inaan sameyno wax allaale iyo wixii aan kugu caawin karno sidii ay koronto iyo gaas kuugu joogi lahaayeen iyo hab aad awoodid oo aad ku bixinkartid waxaad isticmaasho.

Sidaad isaga ilaalin laheyd in lagaa jaro

Jarid:

Waxaan keliya oo aan jarnaa korontada iyo gaaska mar aan sinaba looga wareegan Karin.Waxaad tan isaga ilaalin kartaa haddii aad nala soo xiriirtid oo keliya sida ugu dhaqsiyaha badan si aad u sameysid mid ka mid ah waxyaabahan soo socda:

- Inaad u bixisid habka bangiga lagala baxayo lacagta(Direct Debit)
- Inaad ogolaato waqti aad bixineysid.
- Inaad ogolaato in laguu rakibo mitirka lacagta lagu shubo,haddii ay tahay mid badbaado ah macquulna ah.
- Inaad ku darsanto dadka lacagta ay qabaan laga jaro ceyrta(Third Party Deduction Scheme).

Annaga weligeena kama jareyno anagoo og qof macaamiisheena ah oo dhibaateysan .

Macaamiisha dhibaateysan, waxay yihiin qof waayeel ah,caafimaadkiisu xun yahay,curyaan ah ama dhaqaalihiisu aad u liito,qofkaasuna uusan dhaqaaleyn Karin lacagtisa ama dad kula nool guriga.

Sidaad isaga ilaalin laheyd in lagaa jaro

Soo xirid

Haddii aan kaa jarno sababtuna ay ahayd inaad bixinweydey lacagtii lagugu lahaa,Waxaanu ballan ku qaadaynaa inaan ku soo xirno muddo laba cisho oo kuwa la shaqeeyo ah gudahooda

Haddii aad sameysid mid ka mid ah arrimahan soo socda:

- Bixi lacagta aan kugu leenahay dhammaan,taasoo ay ku jirto wixii yaryar ee lagugu leeyahay waxii shaqada ku kacay.Lacag cadaan ahaan waad u bixin kartaa,Kaarkaaga bangiga oo si toos ah uga imaaneysa lacagta ,Bangiga lacag toos looga soo saarayo oo lagu shubayo bangi kale iyo jeeg.
- Waa inaad ogolaataa sidii aad u bixin lahayd mustaqbalka waxaad isticmaashid-eeg bogga 8 wixii dheeraad ah.
- Waa inaad ogolaataa inaan kuu rakibno mitirka lacagta lagu shubayo(haddii uu badbaado yahay ama ku haboon yahay) mitirka ayaanu ku buuxineynaa sidii aan lacagteena u ururs an lahayn,isbuucii waxaad awoodid .

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd.

Haddii aad dooneysid wixii caawimaad dheeraad ah:

Hay'adaha kale ee ku siin kara caawimaad,waano ama wixii lacag ku saabsan waa:

National Association of Citizen Advice Bureaux (NACAB)

Waano ku saabsan lacagtii oo aad bixin weydey waxaad la xiriiri kartaa:

Telefoonka: **0207 833 2181**

Federation of Independent Advice Centres

Telefoonka: **0207 407 4070**

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd

Macaamiisha faahfaahinta u baahan.

Warbixinta aad u baahan tahay ee guryaha,waxaad wacdaa telefoonka lacag la'aanta ah:**0800 096 9000***
Haddii aad dooneysid inaad warqad noo soo qortid fadlan waxaad u soo dirtaa waraaqaha:

Correspondence Manager
EDF Energy Plc
FREEPOST 3814
LONDON
WC1V 6AJ
Waxaa kaloo nagala soo xiriiri kartaa wadada internetka.
www.edfenergy.com

Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno

Inaan sameyno wixii aad u baahan tahay.
Waxaanu dooneynaa inaan hubsano dadka macaamiisha nala leh oo dhan in isku si loo dhaqaaleeyo waxqabad fiicana la siiyo,Haddii aad u baahan tahay buugaan oo far waaweyni ku qoran tahay,farta dadka indhoolayaasha ama iyadoo cod duuban ah (CD),waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo kooxda qaaska ah telefoonkan lacag la'aanta ah:
0800 269 450*.

Macaamiisha aan ingiriiska ku hadlin.
Haddii ingiriis uusan aheyn luqadaada koowaad,waxaad u baahantahay warbixintaan mid waxtarleh,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.**Waxaana kugu wareejin doonaa qadka qaaska ah ee luqadaha,waxaanu leenahay dad ka shaqeeya telefoonada markaanu isku darno iyaga dhexdooda waxay ku hadlaan 100 luqadood oo kala duwan.
Warbixintan waxaynu haynaa iyada oo ku qoran afafkan ,Urdu,Bengali,Somali,Gujarati,Turkish,Hindi,Punjabi iyo Welsh.

*telefoonada waa lala socon doona , waana la duubi doonaa ,taasina waxay ka mid tahay barnaamijka daryeelka macaamiisha. Wicitaanka 0800 waa lacag la'aan marka aad ka weceyso telefoonka guriga ee waddankan ingriiska,laakiin inay lacag kugu xisaabiyaan baa dhici karta haddii aad ka waceyso telefoonka gacantaada shirkada telefoonkaaga,dhammaan nambarada kale waxaa lagu xisaabin qiimaha go'naa.

Waxqabad fiiro gaar ah u baahan

- Horudhac
- Si aanu u qabano qof walba wuxuu u baahanyahay
- Naftaadu Ma ku xiran tahay korontadaada caafimaad awgeed?
- Dadka anaga naga socda –waxay kugu caawinayaan si aad u dareentid kalsooni
- Ma qof qeyb kamid ah indhahiisa aan
- Wax ka arag maad tahay ama aan aad wax u maqal?
- ilaalinta badbaadadaada iyo caafimaadkaaga.
- Gargaarka dadka duqayda ah
- Gargaarka dadka curyaamiinta ah
- Sidii aad noola soo xiriiri lahayd
- Wadooyin kale ee aan kugu caawin karno

Horudhac

Waxaanu rabnaa inaan xaqiiqsano dhamaan dadka macaamiisha nala leh in isku si loola macaamiloodo ama isku wax loo qabto.

Iyo iney helaan waxqabadka ugu wanaagsan,Haddii aad u baahantahay in si gooni ah wax laguugu qabto. Waxaanu sameyneynaa sida ugu wanaagsan ee aan kugu qancin karno.

Buugani waxa uu kuu sheegayaa waxqabad badan oo ah waxyaabaha fiirada gaarka aan u yeelano.

Si aanu u qabano qofwalba wuxuu u baahanyahay

Ma xaq baad u leedahay in hawl fiiro gaar ah laguu qabto?
Waxaanu qabanaa hawl fiiro gaar ah macaamiisha:

- Indhaha aan waxfiican ka arkin ama maqalku dhib ku yahay.
- Da'ada howlgabka ah.
- Curyaan ah
- Cudar aad u xun qaba
- Leh Waxyaabo kale ee wax loogu qaban karo

Xataa haddii uusan inta aan kor ku soo sheegnay uusan qabin,wali waxaan rabnaa inaan wax kula qabano oo aan eegno qofwalba wuxuu u baahan yahay.
Tusaale ahaan:haddii aad rabtid inaad is ilaalisid waxaadcodsan kartaa in lagu siiyo nambar sir ah oo aad weydiineysid shaqaalaheena intaadan gurigaaga soo gelinin.

Macaamiisheena aan indhaha qeyb wax ka arag,waxaanu siineynaa buugan isaga oo ah cajalad dhegeysi ah ama CD.Si aad u dalbato waxaa lagaa codsanayaa inaad wacdo,kooxda shaqada fiirada gaarka ah telefoonka lacag la'aanta ah **0800 269450*.**
Haddii aad dhegoole tahay isticmaalana telefoonka Dhegoolayaasha ee farta qoraalka ah waxaad wacdaa Qadka dhegoolayaasha(minicom) lacag la'aanta ah **0800 096 2929*.**

Naftaadu Ma ku xiran tahay korontadaada caafimaad awgeed.

Iska qorida waxqabadka gaarka ah: Ma waxaa noloshaadu ku xiran tahay korontada,alaabo daawo ay ku xiran tahay daraadeed ,sida makiinada dhiiga bedesha,makiinada hawada ogsijiinta laga qaato,fiilooyin hawada dadka siiya ama cuntada, ama marwaxada hawada aan caadiga aheyn keentaa?
Mise ma waxaad isticmaashaa ,jerenjerada kor dad u qaada,makiinada dadka sariirta saarta ama meesha lagu qubaysto gelisa?

Marka waxaanu kaa codsaneynaa inaaad noo sheegtid waxanu kugu dareynaa macaamiisha fiirada gaarka ah u baahan,waaxaad marwalba u baahan tahay koronto.Si lagugu daro dadkaa la qorayo waxaad soo wacdaa dadka qaabilsan macaamiisha qaaska telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 269 450.***

Waxaad kaloo ka heli kartaa waanooyin ku saabsan dadka fiirada gaarka ah leh internetkan: **www.edfenergy.com**

Naftaadu Ma ku xiran tahay korontadaada caafimaad awgeed?

Qorshihii loogu talagaley in Wax lagu Keeno oola joojiyey.

Markaad noo sheegtid in aad korontadaan aad isku haleyneysid daawooyin daraadeed ee aan haddayey soo sheegnay,waxaanu weydiin doonaa xaafadaada kuwa korontada qaabilsan si ay u ogaadaan in gurigaagu uu ku jiro xiriirka korontada ee qorsheysan.Hadii aad aragtid inaadan koronto haysan,oo aadna Qatar ku jirto,fadlan la xiriir isbitaalkaaga xaafada.

Dadka anaga naga socda –waxay kugu caawinayaan si aad u dareentid kalsooni.

Sida aad ku garaneysid shaqaalaheena.

Waxaanu aad uga taxadirnaa badbaadada dadka macaamiisha nala leh si aad u weyn,qaas ahaan dadka waayeelka ah iyo dadka keligood nool oo aan dad laheyn.

Sidaa daraaded:

- Dadka annaga naga socda ama noo shaqeeyaba ee gurigaaga imaada waxay marwalba wataan wax lagu aqoonsado.
- Waxaanu kaa codsaneynaa inaadan isdhihin ceebwaaye seen u waydiiyaa aqoonsigooda,qofka naga socda annaga ee saxda ah waxba kama qabo arrintaa.
- Haddii aad shaki ka qabto qof guriga kuugu imanaya anagana noo shaqeeya,ha furin albaabkaaga laakiin si degdeg ah nagu soo wac **0800 269 450*** si aan anaga mitirkaaga kuu eegno.

Habka nanbarka sirta ah:

Waardiye dheeraad ah si aad u hesho, waxaad isticmaali kartaa habkeena nambarka sirta ah.
Dooro un nambarka sirta ah oo adiga uun aad ogtahay,markaas kadib na soo wac **0800 269 450*.** Mar haddaad ku darsanto barnaamijkan,dadka anaga naga socda waxay isticmaalayaan nambarka sirta ah marka ay guriga soo booqanayaan.

Ma qof qeyb ka mid ah indhahiisa aan waxka arag baad tahay ama aan aad wax u maqal?

Sidee baan kaaga dhigi karnaa noloshaaada mid fudud:

Haddii aad tahay qof qeyb kamid ah indhahiisa aan wax ku arag,indhoola ah ama maqalku dhib kugu yahay aadna dooneysid inaad nala soo xiriirtid ama aad dooneysid inaad cabasho sameyso.Waxaanu heynaa waxqabad badan oo aan kugu tala galney:

Shaqooyinka aan u qabano macaamiisha maqalka dhibku ku yahay:

Telefoonka dadka aan wax maqal(minicom)
Telefoonka wuxuu macaamiisha isticmaala habka qoraalka ee dhegoolayaasha u ogolaadaa in ay nala soo xiriiraan.Haddii aad isticmaashid ama aad heysatid telefoonkan waxaad naga soo wici kartaa telefoonka lacag la'aanta ah **0800 096 2929*.**

Haddi maqalka aad dhib ku qabtid oo aadan ka qorneyn dadka fiirada gaarka ah,waxaanu kaa codsaneynaa inaad noo soo sheegtid,si shaqaalaheena ay si taxadir ah kuula dhaqmaan.

Ma qof qeyb ka mid ah indhahiisa aan waxka arag baad tahay ama aan aad wax u maqal?

Waxyaabaha aan u qabano dadka aragoodau uu wax ka dhiman yahay:

Wixii aad isticmaashay oo hadlaya:
Haddii aadan wax arag,waxaanu kuu sameynkarnaa in sedexdii bilood lacagta aad isticmaashay laguu aqriyo lacag la'aan.

Farta waaweyn ama farta indhoolayaasha:
Waxaad dooran kartaa lacagta aad isticmaashid seddexdii biloodba gaaska ama korontada in far waayen laguugu soo diro ama farta indhoolayaasha,telefoonka lacag la'aanta ah **0800 269 450*** si aad u dalbatid waxqabadkan**.**

Mitirka oo laguu aqriyo:
Haddii adan aqrin Karin mitirkaaga,aad baan ugu faraxsan nahay inaan kuu aqrino sedexdii biloodba.Waxaanu keli oo isticmaalaa qof qqas ah oo aan ugu tala galney,waanu kuu soo sheegeynaa balantu iyadoo qoran haddii aad rabtid.Waxaanu balamaha sameeynaa subaxii ama galabtii,isniinta-jimcaha.

Waxaanu kaa codsaneynaa inaad waqti badan na siisd si aanu kuugu sameyno balanta adiga kugu haboon iyo annagaba. Wixii dheeraad ah ee aad u baahato si mitirka laguugu aqriyo, fadlan soo wac telefoonka lacag la'aanta ah **0800 269 450*.**

Mitirada lambarada leh:

Macaamiil fara badan ayaa isticmaala mitirka lambarada leh,waxayna ogaadeen inuu uga fiican yahay kan kale sida lambarada la diro oo kale ah.Haddii aad tahay macaamiisha fiirada gaarka ah ee qoran aad tahay oo uu kuugu jiro mitirka lambaradiisu yihiin isda telefoonka,waad nala soo hadli kartaa si aan kuugu bedelno oo aan mitir kan lambarada leh ah.

Ilaalinta badbaadadaada iyo caafimaadkaaga.

Waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo hadaad caawimaad u baahantahay:

Sida aad u sameysan lahayd si qof kale uu kuugu qaado waraaqahaaga lacagta aad ku bixineysid.
Haddii ay ku caawineyso,waxaanu kuu diyaarin karnaa qof kuu qaada waraaqaha aad lacagta ku bixineysid, waa in uu qofku ogolyahay marka hore waxayna saxiixi doonaan warqada qeybta loogu tala galay kan dadka fiirada gaarka ahi leeyihiin,hase yeeshee waa mas'uuliyadaada inaad hubsato in lacagta la bixiyey.

Waa inaad noo sheegtaa haddii ay wax iska kaa bedeleen.
Si aan u hubsano inaad marwalba kuu qabano waxqabadka kugu haboon.waxaanu kaa codsaneynaa inad noo sheegtid haddii ay wax iska bedeleen caafimaadkaaga ama lacagta kusoo gasha.Waxaanu kaa codsaneynaa inaad sidoo kale noo sheegtid haddii aadan aqrin Karin mitirkaaga ama haddii aad qabtid dhib ka imanaya mitirka lacagta lagu shubo.

Sidii aad ku gaari laheyd mitirka lacagta lagu shubo.
Haddii ay dhib kugu tahay sidii aad ku gaari lahayd mitirkaaga lacagta lagu shubo,waxaanu kuu sameynkarnaa inaan kuugu dhaqaajino meel fiican,haddii ay tahay meel badbaado ah oo ku haboon,Shaqadani caadi ahaan waa lacag la'aan.

Gargaarka dadka duqeyda ah

Yaa kaloo ku caawin kara?

Kooxda dadka duqeyda ah caawiya

Dadkan dadka u kaalmeeya,waxay sameeyaan uug iyaga ay leeyihiin kaasoo ku siinaya sidii quwada loo dhaqaaleyn lahaa,kaasoo daboolaya waxwalba sida,sidii aad waqtiga qaboobaha aad kulayl u keydsan lahayd iyo sidii aad u heli lahayd lacagta caawimaada ah si aad gurigaa u cubatid.Waxaad ka heli kartaa meesha ay degan yihiin buuga telefoonada lagu qoro.Waa kuwan telefoonada xafiisyadooda waaweyn.

Help the Aged
Telefoonka: **0808 800 6565**

Age Concern England
Telefoonka: **0800 00 9966**

Foundations
Telefoonka**: 01457 891 909**

(Qeybta u qaabilsan wadanka sidii loo hagaajin lahaa guryaha iyo sameyskooda)

Gargaarka dadka curyaamiinta ah.

Kooxda waanada ee dadka curyaamiinta

Kooxdani waxay ku siin karaan waano waxku ool ah oo ku saabsan gaaska ama korontada haddii aad tahay qof curyaan ah.

Royal National Institute for the Blind
Telefoonka: **0207 388 1266**

Royal National Institute for the Deaf People
Telefoonka: **0808 808 0123**
Telefoonka sida teebka loo garaaco: **0808 808 9000.**

Sense (the National Deaf, Blind and Rubella Association)
Telefoonka**: 0207 272 7774**
Telefoonka sida teebka loo garaaco**: 0207 272 9648.**

Disable Living Foundation
Telefoonka: **0845 130 9177**
Telefoonka indhoolayaasha: **0870 603 6176**

Royal Association for Disability and Rehabilitation

Telefoonka**: 0207 250 3222**
Telefoonka sida teebka loo garaaco: **0207 250 4119.**

Sidii aad noola soo xiriiri lahayd

Sidii aad noola soo xiriiri laheyd
Dadka fiirada gaarka ah u baahan telefoonka lacag la'aanta ah ee laga caawiyo.
Haddii aad u baahan tahay warbixin guud ahaaneed, gaar ahaan macaamiisha fiirada gaarka ah leh,waxaa la idinka codsanayaa inaad soo wacdaan telefoonkan **0800 269 450*.**
Qadadku waxay furan yihiin 8.00am-8.00pm isniinta-jimcaha, 8.30am-2pm sabtiga.

Dadka isticmaala telefoonka indhoolayaasha ee lacag la'aanta ah.
Macaamiisha doonaysa iney nagula soo xiriiraan telefoonka dadka indhoolayaasha ee sida teebka loo qoro waxay naga soo wici karaan**: 0800 096 2929*.**
Qadadku waxay furan yihiin 8.00am-8.00pm isniinta-jimcaha, 8.30am-2pm sabtiga.

Macaamiisha qadka telefoonka Lacag la'aanta ah wax weydiiya.
Hadii aad guryaha aad u soo waceyso waxaad weci kartaa telefoonka lacag la'aanta ah: **0800 096 9000*.**
Qadadku waxay furan yihiin 24 saacadood maalin walba ,xataa maalmaha ciida.
Haddii aad dooneysid inaad noo soo qorto warqad waxaa lagaa codsanayaa inaad ku soo dirtid:

Correspondence Manager
EDF Energy Plc
FREEPOST 3814
LONDON
WC1V 6AJ

Waxaad kaloo nagala soo xiriiri kartaa wadada internetka websaytka
www.edfenergy.com

Wadooyin kale ee aan kugu caawin karno.

Inaan sameyno wixii aad u baahan tahay.
Waxaanu dooneynaa inaan hubsano dadka macaamiisha nala leh oo dhan in isku si loo dhaqaaleeyo waxqabad fiicana la siiyo,Haddii aad u baahan tahay buugaan oo far waaweyni ku qoran tahay,farta dadka indhoolayaasha ama iyadoo cod duuban ah (CD),waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo kooxda qaaska ah telefoonkan lacag la'aanta ah:**0800 269 450*.**
Macaamiisha aan ingiriiska ku hadlin.

Haddii ingiriis uusan aheyn luqadaada koowaad,waxaad u baahantahay warbixintaan mid waxtarleh,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.**Waxaana kugu wareejin doonaa qadka qaaska ah ee luqadaha,waxaanu leenahay dad ka shaqeeya telefoonada markaanu isku darno iyaga dhexdooda waxay ku hadlaan 100 luqadood oo kala duwan.
Warbixintan waxaynu haynaa iyada oo ku qoran afafkan ,Urdu,Bengali,Somali,Gujarati,Turkish,Hindi,Punjabi iyoWelsh.

*telefoonada waa lala socon doona , waana la duubi doonaa ,taasina waxay ka mid tahay barnaamijka daryeelka macaamiisha. Wicitaanka 0800 waa lacag la'aan marka aad ka weceyso telefoonka guriga ee waddankan ingriiska,laakiin inay lacag kugu xisaabiyaan baa dhici karta haddii aad ka waceyso telefoonka gacantaada shirkada telefoonkaaga,dhammaan nambarada kale waxaa lagu xisaabin qiimaha go'naa

EDF Energy waa macac ganacsi ah oo ay isticmaasho EDF customers Plc Reg. No:02228297 xafiiska uu ka qoran yahayna ku yaal 40 Grosvenor Place,London SW1X 7EN,waxaana isla wadaaga ingriiska iyoweelshiga.EDF Energy Customers Plc waxaa isaga oo dhan iska leh Oo qiimeeya EDF Energy Plc, mas'uuliyadeeda habka ay wax u qabaneyso iyo soo gudbinta waxqabadka dhamaan EDF Energy waxaa mas'uulka ah EDF Energy Customers Plc.

Gurigaaga sidii lagu soo geli lahaa.

- Horudhac
- Sida lagu garto dadka noo shaqeeya
- Shaqaalaha soocida iyo tababarkooda
- Sidaad noola soo xiriiri lahayd
- Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno

Horudhac

Annagu badbaadada dhamaan macaamiisheena aad baaan uga taxadirnaa:

Taas ayaa sabab u ah marka qof annaga naga socda uu kuu imanayo si taxadiran ayaa laguugu soo doortay,aad u tababaran iyo isagoo mar walba sita aqoonsigiisa.
Buugani waxa uu kuu sheegaya arrimaha anaga na saran inaan qabano markaanu gurigaaga imaneyno iyo waxyaabaha aan qabano sida nabadaada loo ilaalin lahaa iyo waxyaabo u baahan inaad maskaxda ku hayso.

Sida lagu garto dadka annaga naga socda.

Shaqaalaheenu si fudud ayaa lagu gartaa:

Waanu ognahay inaad doonaysid inaad xaqiijiso shaqaalahayaga iney yihiin kuwo ka socda EDF energy.
Sidaa daraadeed waxaanu sameyney si lagu garto shaqaalaheena, waxaanu sameyney waxan soo socda:

- Meelaha suurta galka ah, gaariga alaabta lagu qaato ee dhinacya ka furma(caasiga) mid walba oo iyagu leeyihiin ama gaariga yar haddii aan ku imaaneyno gurigaaga waxaa ku qoran shirkada magaceeda iyo calaamada lagu garto.
- Haddii la sameynkaro,qofka gurigaaga imanayo wuxuu gashan yahay dhar ay ku qoran yihiin astaanta shirkada.
- Dhamaan shaqaalaheena waxay wataan kaarka aqoonsiga, kaasoo ay marwalba oo ay imanayaan ku tusayaan.

Sida lagu garto dadka annaga naga socda.

Kaararka Aqoonsiga

Kaararka aqoonsigeena waxaad ku arkeysaa waxyaabahan soo socda:

- Shirkada ganacsiga magaceeda(waxaa laga yaabaa inay dad kale shaqo soo siiyaan shirkadana u shaqeeya EDF energy,ineyan si toos ah uga iman EDF energy baa laga yaabaa)
- Magaca qofka kaarka wata
- Sawir nooca ugu dambeeyeey ah ee qofka kaarka wata.
- Telefoon si fudud aad u arki kartid,kaasoo aad naga soo wici kartid si aad u hubsato qofkan annaga naga socda aqoonsigiisa.
- Taariikhda aqoonsigu dhacayo(kaarku lama isticmaali karo waqtigaa wixii ka dambeeya).Si aan u xaqiiqsano kaararka aqoonsigeena inuu wato oo keliya dadka loogu tala galay oo keliya.Marka taariikhdoodu dhamaato waanu jejebinaa ama Haddii qofkii loo sameeyey uusan ka shaqeyneynin meeshaa.
  Dhamaan dadka noo shaqeeyaa waxay wataan warqada aqoonsiga oo farwaaweyni ku qoran tahay,taasoo loogu tala galay macaamiisha xoogaa wax arka.

Sida lagu garto dadka annaga naga socda.

Habka lambarka sirta ah:
Si taxadir dheeraad ah laguu siiyo,waxaad isticmaali kartaa habka lambarka sirta ah.

- Dooro lambarka sirta ah,ee adiga kuu qaaska ah markaa kadibna na soo wac telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 269 450*.**
- Mar haddii aad ka mid noqotay dadkan lambarka sirta ah wata,qofka anaga naga socda waxay marwalba isticmaalayaan lambarka sirta ah Markey gurigaaga imanayaan.
- Meel ayaan ku qoraynaa lambarkaaga sirta ah oo aan la ogeyn oo la hubo,waxaan keliya oo u sheegnaa dadkii la rabay iney ogaadaan oo keliya.

Badbaado:
Badbaadadaada awgeed,waxaanu kugula talineynaa inaad sameysid marka qof albaabka soo garaaco,waa inaad hubsataa inuu yahay qof annaga naga socda.

- Isticmaal silsilada albaabka lagu xiro iyo daloolka wax laga fiiriyo ilaa aad ka xaqiijisid qofka soo garaacay qofkuu yahay.
- Weydii qofka soo garaacey warqadiisa aqoonsiga inta aadan soo gelin.Haka xishoonin markaad weydiineysid aqoonsigiisa –dadka runta ah ee annaga naga socda waxba kama qabaan.
- Haddii shaki kaaga jiro qofka soo garaacaya inuu yahay qof annaga naga socda iyo inkale,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdid **0845 603 9261***

Markaasaan kuu xaqiijin doonaa qofku inuu yahay qof annaga naga socdo.

Shaqaalaha soocida iyo tababarkooda

Waxqabadkeenu si uu meel sare u ahaado:
Si aan u xaqiiqsano inaan heysano dadka ugu wanaagsan ee noo shaqeeya waa inaan:

- Hubsanaa dadka kuu imanayo iney soo qaateen tababar buuxa si uu shaqadan u qabto.
- Inaan sii wadnaa tababarka dheeraad ah oo siinayo shaqaalaha meeshii looga baahan yahay.
- ilgaar ah u yeelano shaqaalaha wax qabadkooda.

Shaqaalaha soocida iyo tababarkooda

Sidii aan u ilaalin lahayn sidii dadka annaga noo shaqeeya ay u noqon lahaayeen dad waxyaqaana.

Dadka annaga na matala waa shirkadaeena daka hortiisa ,sidaa daraadeed waxaan rabnaa iney qanciyaan dadka.Haddii qof anaga naga socda uu yimaado gurigaaga si fiican baanu isugu daynaa iney:

- Degan yihiin ,hadal fiicana ku hadlaan si aysan isaga dhigin qof wax walba yaqaana.
- Isticmaalaan luqad wanaagsan.
- U sharxaan si cad wixii looga baahan yahay iyo iney saxan yihiin.
- Dhegeystaan waxaad ka cabaneyso,ayna sameeyaan intii karaankooga ah sidii ay kuu qancin lahaayeen.
- Is ilaaliyaan ayna ixtiraamaan gurigaaga dhulkaaga.
- Kaana caawiyaan qofkii aad la xiriiri lahayd haddii aad u baahan tahay caawimaad.
- Ku siiyaan telefoonada,haddii aad sameyneysid cabasho ama aad rabto inaad ka hadasho wax culays kugu haya oo ku saabsan badbaadadaada iyo nabadgelyadaada.
- La socdaan sharciyadeena si ay noogu soo sheegaan haddii mitir lagu xadgudbay ama wax laga haleeyey,ama ay arkaan wax u baahan in wax laga qabto mar ay caadi isaga imaadeen.
- Ogyihiin waxa ku qoran buugan ayna ku dhaqmayaan.

Haddii dadka annaga noo shaqeeya aysan la soconeynin waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay,waxaanu ka qaadeynaa waxyaabaha ku haboon.

Sidaad noola soo xiriiri lahayd

Sidaad noola soo xiriiri lahayd;

Macaamiisha qadka telefoonka wax weydiiya

Hadii aad guryaha aad u soo waceyso waxaad wacdaa telefoonka lacag la'aanta ah: **0800 096 9000*.**
Haddii aad tahay macaamiisha ganacsiga yar leh oo sannadkii isticmaala wax ka yar £30k oo quwad ah sanadkii waxaa lagaa codsanayaa inaad so wacdo telefoonka lacag la'aanta ah **0800 096 2255***.

Macaamiisha ganacsatada oo sannadkii ku bixiya wax ka yar £20k oo quwad ah sanadkii waxaa laga codsanayaa iney soo wacaan: **0845 366 3664*.**

Macaamiisha ganacsatada oo sannadkii ku bixiya wax ka badan £20k oo quwad ah sanadkii waxaa laga codsanayaa iney soo wacaan:
0845 366 3661*.

Haddii aad dooneysid inaad noo soo qorto warqad waxaa lagaa codsanayaa inaad ku soo dirtid:

Correspondence Manager
EDF Energy Plc
FREEPOST 3814
LONDON
WC1V 6AJ

Waxaad kaloo ngala soo xiriiri kartaa wadada internetka websaytka
www.edfenergy.com

Wadooyin kale oo aan kugu caawin karno.

Inaan sameyno wixii aad u baahan tahay.
Waxaanu dooneynaa inaan hubsano dadka macaamiisha nala leh oo dhan in isku si loo dhaqaaleeyo waxqabad fiicana la siiyo,Haddii aad u baahan tahay buugaan oo far waaweyni ku qoran tahay,farta dadka indhoolayaasha ama iyadoo cod duuban ah (CD),waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo kooxda qaaska ah telefoonkan lacag la'aanta ah:**0800 269 450*.**

Macaamiisha aan ingiriiska ku hadlin.
Haddii ingiriis uusan aheyn luqadaada koowaad,waxaad u baahantahay warbixintaan mid waxtarleh,waxaanu kaa codsaneynaa inaad soo wacdo telefoonkan lacag la'aanta ah **0800 096 9000*.** Waxaana kugu wareejin doonaa qadka qaaska ah ee luqadaha,waxaanu leenahay dad ka shaqeeya telefoonada markaanu isku darno iyaga dhexdooda waxay ku hadlaan 100 luqadood oo kala duwan.
Warbixintan waxaynu haynaa iyada oo ku qoran afafkan ,Urdu,Bengali,Somali,Gujarati,Turkish,Hindi,Punjabi iyo Welsh.

*telefoonada waa lala socon doona , waana la duubi doonaa ,taasina waxay ka mid tahay barnaamijka daryeelka macaamiisha. Wicitaanka 0800 waa lacag la'aan marka aad ka weceyso telefoonka guriga ee waddankan ingriiska,laakiin inay lacag kugu xisaabiyaan baa dhici karta haddii aad ka waceyso telefoonka gacantaada shirkada telefoonkaaga,dhammaan nambarada kale waxaa lagu xisaabin qiimaha go'naa.

EDF Energy waa macac ganacsi ah oo ay isticmaasho EDF Customers Plc Reg. No:02228297 xafiiska uu ka qoran yahayna ku yaal 40 Grosvenor Place,London SW1X

7EN,waxaana isla wadaaga ingriiska iyoweelshiga.EDF Energy Customers Plc waxaa isaga oo dhan iska leh Oo qiimeeya EDF Energy Plc, mas'uuliyadeeda habka ay wax u qabaneyso iyo soo gudbinta waxqabadka dhamaan EDF Energy waxaa mas'uulka ah EDF Energy Customers Plc.

Soo Gudbinta Cabasho - Macaamiisha Degaanka Ah Iyo Kuwa Ganacsiyada Yaryar

Tusmada
Hordhac
Waxaan diyaar u nahay inaan ku caawino
Daboolista baahidaada

Adeeg wanaag

Halkaan EDF Energy, waxaanu diyaar u nahay inaan kuu fidino Adeeg heer sare ah. Haddii aanad ku qanacsanayn heerka adeega aan kuu qabanay, fadlan noo sheeg si aan iskugu dayno inaan arrinta si degdegsiimo ah u xalino.

Waxaanu Diyaar U Nahay Inaan Ku Caawino

Nidaamka cabashada

Haddii aad cabasho qabto, fadlan raac talaabooyinkan soo socda:

Talaabada 1aad: Nala soo xidhiidh.
Talaabada koowaad ahaan, fadlan siyaabahan soo socda mid ka mid ah noola soo xidhiidh:
• Ka Soo wac shaqaalahayaga aadka u tabobaran ee Adeega Macaamiisha **0800 096 9000*** haddii aad tahay macamiil degaan ah ama soo wac **0800 096 2255*** haddii aad tahay macaamiisha ganacsiga yaryar, si aan u falan qayno mushkiladaada.

• Waraaq noo soo dir oo ku soo hagaaji:
Kooxda La Shaqaynta Macaamiisha,
EDF Energy,
Freepost 3814,
WC1V6A

• Iimayl noogu soo dir
customer_correspondence@edfenergy.com

• Soo booqo goobahayaga si aad u gasho kulan fool-ka-fool ah (fadlan fiiri ciwaanada ku yaal dhabarka buug-yarahan)

Talaabaada 2aad: Wali kuma qanacsanid….?
Haddii La taliyayaashayada Adeega Macaamiishu aanay awoodi karin inay xaliyaan arintaada ama guud ahaan aanad ku faraxsanayn xalka ay keeneen, waxaad arintaada u gudbin kartaa Maamulaha Kooxda.

Talaabada 3aad: Si buuxda uma qanacsanid….?

Haddii wali aanad qanacsanayn, waxaad codsan kartaa dib u eegis buuxda oo cabashadaada:
• Waraaq u dir Agaasimaha Maamulka ama adeega macaamiisha
EDF Energy
Freepost 3814
London
WC1V 6AJ

• Iimayl u dir Agaasimaha Maamulka ee Adeega Macaamiisha:
ManagingDirectorofCustomerServices@edfenergy.com

Natiijada Cabashada

Waxaanu cabashadaada uga jawaabi doonaa sida ugu dhakhsaha badan waxaanuna bar tilmaameed ka dhiganaynaa inaan 10 maalmood gudahood.
Kadib gorfayn buuxdda oo cabashadaada ah waxaa laga yaabaa inaan qaadno talaabooyinkaan soo socda:
• Raaligelin iyo sharaxaad natiijada iyo sababta ay arrintani u dhacday.

• Qaadista talaabooyinka haboon si sixid loo sameeyo.
• Sharaxaad talaabada xigta ee aan qaadayno taas oo ay ka mid noqon karto magdhow ay bixiso EDF Energy (marka baadhista buuxdaa dhamaato) haddii cabashadaadu la xidhiidho dhadhaqaaqayaga iibka.

Wali ma waxaad dareensan tahay inaan arintaadii la xalin…?

Loo soo cawdayaasha (Ombudsman) Eneray waa gudi madax banaan taas oo leh awooda xalinta muranada macaamiisha.
Waxaa laga yaabaa inay baadhaan cabashadaada haddii:
• Aad waraaq ka hesho EDF Energy taas oo sii si waadix ah u muujinaysa mawqifkayaga u dambeeya ee cabashadaada. Kadib waxaad u wareejin kartaa cabashadaada gudida loo soo cawdayaasha (Ombudsman) muddo lix bilood ah gudahood marka aad hesho waraaqdan.
• Wali aanad helin waraaq sidan oo kale ah, laakiin ugu yaraan 8 todobaad ay dhaaftay markii u horaysay ee aad soo cabatay. Waa inaad cabashadaada u gudbisaa gudida loo soo cawdayaasha muddo 9 bilood ah gudahood marka aad samaysa cabashadaada u horaysa.

Macaamiisha ganacsiga yaryar
Si aad u ogaato bal in ganacsigaagu xaq u leeyahay waxtarka gudida loo soo cawdayaasha (Ombudsman) fadlan si toos ah ula xidhiidh (Tafaasiishu waxay ku taxan tahay hoos).

Ciwaanka lagala xidhiidhiyo gudida loo soo cawdayaasha (Ombudsman) Energy.
• Tilifoon: 0845 055 0760 (Isniinta ilaa Jimcaha, 9am ilaa 5pm)
• Mareegta: www.energy_ombudsman.co.uk
• Ciwaanka: Gudida loo soo cawdayaasha (Ombudsman)
PO Box 966
Warrington
WA4 9DF

War dheeri ah oo aanu ugu talo galnay macaamiishayada degaanka ah

Haddii aad jeclaan lahayd in dib loogu daabaco far waawayn, farta indhoolayaasha, ama qaab dhegaysi ah oo CD ku duuban, fadlan wac kooxdayda Mudnaanta Adeegyada (Priority Service Team) oo lagala hadli karo si bilaash ah lambarkaan 0800 269 450*.

Macaamiisha aan afka Ingiriisiga ku hadal.
Haddii aanu Ingiriisigu ahayn afkaaga koowaad, fadlan si bilaash ah nagala soo hadal lambarkan **0800 096 9000*** waxaanuna kuu gudbin doonaa khadkayaga afka gaarka halkaas oo ay ku sugan yihiin hawlwadeeno ku hadlo in ka badan 100 af oo kala duwan.

Hadii aanu xalin kari wayno mushkiladaada waxaad la xidhiidhi kartaa Koonsuyuumar Daarakt (Consumer Direct), adeega dawlada ee talooyin waadix ah, dhexdhexaad ah, oo ku saabsan dhamaan waydiimaha macaamiisha. Fadlan kala xidhiidh iyaga **08454 04 05 06** ama internet-ka **www.consumerdirect.gov.uk**

Halkan waxaa ku yaal ciiwaanada xafiisyadayada haddii aad jeceshahay inaad booqato mid ka mid ah xafiisyada si aad kulan fool-ka-fool ah oo ku saabsan cabashadaada u samayso:

Hove Office
EDF Energy
329 Portland Road
Hove
BN3 5SU

Worthing Office
EDF Energy
Southdown view Road
Worthing
BN14 8NL

Plymouth Office
EDF Energy
334 Outland Road
Manadon, Plymouth
Devon
PL3 5TU

Exeter Office
EDF Energy
Gadeon House, Grenadier Road
Exeter Business Park
Exeter
EX1 3UT

* Tilifoonada waxaa laga yaabaa in la kormeero taas oo qayb ka ah barnaamijkayaga daryeelka macaamiisha, khadadka 0800 waa bilaash laakiin ujrada xidhiidhada guduhu waa kala duwanaan karaan. Dhamaan lambarada kale waxa lagu qiimeeyaa ujro caadi ah.

EDF Energy waa magic ganacsi oo loo isticmaalo EDF Energy Customers plc, Reg. No. 02228297 oo Xafiiska Sajilaadeedu uu yahay 40 Grosvenor Place, London SW1X 7EN, kana diiwaangashan England iyo Wales. EDF Energy Customers plc oo farac buuxa oo ka mid ah EDF Energy plc. Mas'uuliyadda waxqabadka ee qaybinta dhammaan tamarta EDF Energy waxay dul taal EDF Energy Customers plc.

Badbaadsanaanta Gaasta

Hordhac
Khataraha qarsoon
Baaritaanka gurigaaga
La xidhiidh
Siyaabo kale oo aan kuu caawin karno

Buug-yarahan wuxuu ku siinayaa habab loo horumarinayo badbaadsanaanta gaasta gurigaaga, waxaanu kuu sheegayaa waxaad aad doonayso inaad samayso markii ay jiraan xaalado deg-deg ah

Dhabarka, waxaad ka heli doontaa lambarada tilifoonada aad wici karto si aad caawimo ama talo u dalbato.

Khataraha dahsoon

Khataraha dahsoon

Badbaadsanaanta guriga

Ogolow in hawo daray ahi wareegto

Haddii aad isticmaalayso gaas, saliid ama qalabka shidaalka, ha xaniban laydha qolka ay ku jiraan. Hawo darayga ahi waxay u baahan tahay inay wareegto si qalabkaagu u badbaadsanaado.

Khatarta liiga gaasta

Waxaa muhiim ah in la ogaado khatarta kaarboon mono-oksaydhka iyo liiga gaasta:

• Kaarboon mono-oksaydh waxay ka timaaddaa qalabka gaaska ee cadilan isla markaana aan sida fiican loo rakabin ama hagaajin.
• Qaar ka mid ah calaamadaha hore ee kaarboon mono-oksaydhka waxa weeye: daal, lulmo, madax xanun, xanuunka laabta iyo caloosha ah.
• Suntu waxay keeni kartaa dhaawac ku yimaad habdhiska dareenka oo mudo dheer qaata.

Haddii aad sameyso baaritaanka badbaadsanaanta gaasta waad yarayn kartaa khatarahan.

Waa maxay kaarboon mono-oksaydh?

Kaarboon mono-oksaydh waa gaas aan ur iyo midab lahayn oo sababto dhimashada 50 qof iyo dhaawaca 200 oo qof oo ku nool UK sanad walba. Ku sumowga kaarboon mono-oksaydh aad looma baadho, sidaa darteed dad badan ayaa qaba oo aan is ogayn. Caruurta, dumarka uurka leh iyo ilmahooda iyo dadka qaba wadno xanuunka ayaa halista ugu badan ugu sugan.

Maadaama aanay kaarboon mono-oksaydh lahayn ur, waxaa laga yaabaa inaad gurigaaga ku rakibto qalabka baadha kaarboon mono-oksaydhka. Qalabkani waxay si dhakhso ah kuugu sahlayaan inaad ogaato marka hawada uu ku jiro xadi badan oo kaarboon mono-oksaydh ahi. Hubso inaad rakibto qalab gaadhsiisan heerka Badbaadsanaanta ee Yurub ama Ingiriiska.

Baaritaanka gurigaaga

Baaritaanka badbaadsanaanta Gaasta

Miyaad u qalmi kartaa baaritaan bilaash ah?

Haddii aad tahay macmiil gaas iyo milkiile guri, waxaa laga yaabaa inaan awoodno inaan kuu samayno baaritaanka badbaadsanaanta gaasta oo bilaash ah. Waxaad xaq u leedahay baaritaanka badbaadsanaanta gaasta oo bilaash ah haddii:

• Aad heshoo taageero dhaqaale (means-tested benefit) oo aad haysato ilmo shan jir ka yar, ama

• Aad tahay da'da hawlgabka, aad curyaan tahay ama aad qabto xanuun soo jiitamay isla markaana aad kelidaa nooshahay
• Aad tahay da'da hawlgabka, aad curyaan tahay ama aad la nooshahay dad kale oo dhamaantood da'dii hawlgalka ah, qaba xanuun soo jiitamay ama ka yar da'da 18 jirka.
Iyo
• Aad na waydiisato inaan kuu samayno baaritaanka badbaadsanaanta gaasta oo bilaash ah.
•. Aanad helin baaritaanka badbaadsanaan gaas oo goobtaada ah laba iyo tobankii bilood ee u dambeeyay

Baaritaanka badbaadsanaanta waxaa si bilaash ah ku sameyn doono injineer waayo aragnimo leh wuxuuna ku samayn doonaa qalabka gaasta ku shaqeeya iyo waxyaabaha gaasta xidha.

Ka waran haddii aad ku dhacdo baaritaanka badbaadsanaanta gaasta?

Haddii qalab uu ku dhaco baaritaanka badbaadsanaanta gaasta, gaasta ayaala goyn doonaa waxaana lagu calaamadin doonaa in aanu badbaadsanayn. Ha isticmaalin qalabkan ilaa dib loo hagaajiyo ama uu ka shaqeeyo injineer aqoon u leh. Wixii talo iyo taageero dheeraad ah, fadlan wac Kooxda Mudnaanta Adeega oo laga wici karo **0800 269 450***.

Baaritaanyada Gaasta ee Ingiriiska way is bedeshay. Diiwaangelintii CORGI waxay ku dhamaatey Ingiriiska 31-kii Maarso. Markaa ha codsan injineer COGRI. Waxaad codsataa Injineerka Badbaadsanaanta Gaasta (Safe Register™ Engineer). Sharci ahaan injineerada gaastu waa inay ku qoran yihiin Diiwaanka Badbaadsaanta Gaasta. Had iyo goor fiiri kaadhkooda aqoonsiga. Wixii macluumaad ah booqo www.GasSafeRegister.co.uk

Xaq uma laha badbaadsanaan baaris bilaash ah?
Haddii aad xaq u leedahay ka hubinta badbaadsanaanta gaasta bilaashka ah, fadlan xaqiiji in injineer aqoon u leh si joogto ah qalabka gaasta u baaro.

Gurigaaga miyaad kiraysatay?
Haddii aad kiraysatay gurigaaga, waa masuuliyada miulkiilaha inuu hubsado badbaadsanaanta qalabka iyo inuu si sanadle ah u sameeyo baaritaan.

La xidhiidhid

Sida la noola soo xidhiidhayo
Haddii aad uriso gaas ama aad u malaynayso inuu gaas liigayo, waxaad la hadli kartaa lambarka Xaaladaha Degdega ah ee Korontada Qaranka oo ah **0800 111 999***. Khadadku waxay furan yihiin 24 saacadood maalintii, maalin walba, oo ay ku jiraan fasaxyada qaranku.

Khadka Su'aalaha Macaamiisha
Wixii waydiin degaanka ah, fadlan bilaash ku wac **0800 096 9000***.
Haddii aad jeceshahay inaad qoraal nagula soo xidhiidho, fadlan ku soo hagaaji:
Correspondence Manager
EDF Energy plc
FREEPOST 3814
LONDON
WC1V 6AJ
Waxaad sidoo kale nagala soo xidhiidhi kartaa boggayaga internetka:
www.edfenergy.com

Siyaabo kale oo aan kuu caawin karno

Wax ka qabadka baahidaada

Waxaan doonaynaa inaan hubsano in dhamaan macaamiishayada loola dhaqmo si cadaalad ah oo ay helaan adeega ugu wanaagsan ee suurtagalka ah. Haddii aad u baahan tahay qoraalkan oo far waawayn ku qoran, ku qoran farta indhoolaha, ama aad ku doonayso hab maqal ah ama CD, Fadlan la hadal Kooxdayada Mudnaanta Adeeg oo bilaash laga wici karo **0800 269 450***.

Macaamiisha aan Ingriisiga ku hadlin
Haddii Ingiriisigu aanu ahayn luuqadaada koowaad oo aad jeclaan lahayd in macluumaadka lagugu siiyo mid kale, fadlan bilaash nagaga soo wac **0800 096 9000*** waxaanuna kuu gudbin doonaa khadka luuqadaha u gaar ah. Waxaanu leenahay hawl-wadeeno, dhexdooda, ku hadli kara in ka badan 100 luuqadood. Gacan-qabsigaan waxaa sidoo kale lagu heli karaa faransiis, Urduu, Bengaali, Soomaali, Gujuraati, Turkish, Hindi, Bunjabi iyo Weelash.

* Tilifoonada waxaa laga yabaa in la kormeero ama la dhagayso taas oo qayb ka ah barnaamijka daryeelka macmiilka. Lambarada wata 0800 waa bilaash marka laga so wacayo laymamka UK laakiin waxaa laga yaabaa in shirkaaddaadu tilifoonka lacag kugu soo dallacdo haddii aad ka soo hadlayso moobil. Lambarada kale oo dhani waxaa lagaa qaadaya sixirka maxaliga ah.